MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.1.89 Lumid Jeeg War. L. 0283301 ku qoran Somali Airleynis L. 34 » 52

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.1.89, Lumid Jeeg War. L. 1168982 ku qoran Istarliin Muuse Axmed L. 35

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 1, taariikh 1.1.1989: Oggolaansho Miisaaniyad da ku talo galka Dawladda ee sannadka 1989.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in av uruuriso dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran Miisaaniyadda halkan ku lifaaqan ayadoo la raacayo Xeerka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka guud ee Miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan Madaxyada Miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyey Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarafka hoos yimaada Madax-xige waliba waxaa awood loo siiyey Wasiirka Wasaarad waliba Kala wareejinta ceynkan oo kale ah ee Miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood loo siiyey Guddoomiyaha Horumarinta ee Gobol walba.

Qod. 3aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu asaga oo haysta oggolaashaha Golaha Wasiirrada, wuxuu si aan caadi ahayn u go'aamin karaa in uu keyd ka dhigo qayb ama dhammaan lacagtii la qoondeeyey ee aan la isticmaalin, sida uu qabo Qod. 57aad ee Sharciga Maamulka Xisaabaadka Qaranka.

Qod. 4aad

Miisaaniyadda loogu talo galay mashaariicda horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya mashruuc horumarineed.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1989 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.1.1989

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre

QTYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 6 ee 31 Dis. 1988: Guddiga Baarista Cabashooyinka Xuquuqul-Insaanka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, qaybtiisa 14aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU GARAWSADAY: In la abuuro Guddi ka baaraandega, kana bixiya jawaabta ku habboon cabashooyinka iyo eedaha ka yimaada hay'adaha iyo shakhsiyaadka u dooda xuquuqul-insaanka;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo-soo-jeedinta hay'adaha dawladda oo arrimahani khuseeyaan;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:-

Qod. 1aad

Dhismo Guddi

Waxaa la dhisay Guddi dersa, baara, jawaabna ka bixiya markay habboonaato cabashooyinka iyo eedaha la xiriira dad ka loo haysto dunuubta, gaar ahaan kuwa saameeya Siyaasadda, kana yimaada hay'adaha iyo shakhsiyaadka u dooda xuquuqul-insaanka (Human rights Commission), sida guddihoosaadka la dagaalanka midabtakoorka iyo ilaalinta dadka lagu badan yahay, iyo hay'adaha madaxbannaan (Non Governmental Organisations), iyo wixii la mid ah.

Qod. 2aad

Xubnaha Guddiga

1) Guddiga ku xusan Qod. 1aad ee Xeerkan, wuxuu ka kooban yahay:-

I) Guddoomiyaha Maxkamadda Bad/dada Dalka Gud/miye
II) Wasiirka W. Arrimaha Dibedda Gud. Ku-Xigeen;
III) Wasiirka W Arrimaha Gudaha Xubin;
IV) Taliyaha Ciidanka Booliska Xubin
V) Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda Xubin

2) Hadday Xubin ka mid ah guddiga ku timaaddo sabab u suurtagelinweyda gudashada waajibaadkeeda, xilkeeda meel-ku-gaar ahaan waxaa qabanaya ku-simaha hay'adda qofku ka tirsan yahay;

Qod. 3aad

Xilka Guddiga

Guddiga ku xusan Qod. 2aad ee Xeerkan si uu u fuliyo waajibaadkiisa wuxuu hoggaamiyaa, hawlgeliyaana Guddi-Hoosaadka ku xusan qodobka 4aad ee isla Xeerkan;

Qod. 4aad

Guddi Hoosaadka

1) Waxaa isagana la abuuray guddi-hoosaad ka kooban aqoonyahan oo kala ah:-

I) Hawl-wadeen ka tirsan Wasaaradda Arri-mahaDibedda Guddoomiye;

II) Hawl-wadeen ka tirsan Wasaaradda Arri-Gudaha Xubin;

III) Sarkaal ka tirsan Ciidanka Booliska Xubin;

IV) Sarkaal ka tirsan Ciidanka Nabad/da Xubin & Xog'hayn

V) Sarkaal ka tirsan Xeer-Ilaalinta Guud ee MBD Xubin

VI) Sarkaal ka tirsan Xeer-Ilaalinta Guud ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida Xubin:

2) Guddoomiyaha ama Xubnaha ku xusan qodobkan waxaa magacaabaya, beddeli karana Guddoomiyaha Guddiga ku xusan qod. 2aad ee Xeerkan isagoo la tashanaya Madaxa hay'adda uu ka tirsan yahay hawl wadeenka ama Sarkaalka la magacaabayo ama la beddelayo:

Qod. 5aad

Xilka Guddi-Hoosaadka

Guddi Hoosaadku wuxuu ku shaqeeyaa hoggaaminta iyo tilmaanta Guddiga ku sheegan qod. 2aad ee isla Xeerkan gaar ahaan wuxuu ka xilsaaran yahay waajibaadkiisa guud ka sokow:-

b) La socodsiinta Guddiga ku xusan Qod. 2aad ee Xeerkan qoraal ahaan cabashooyinka iyo eedaha kaga yimaada JDS hay'adaha iyo shakhsiyaadka u dooda xuquuqal insaanka;

t) Sugidda baaristo arrimaha loo xilsaaray;

j) U diyaarinta Guddiga ka sarreeya jawaab celinta cabashooyinka iyo eedaha loo soo jeediyo Jamhuuriyaddda Dimoqraadiga Soomaaliya;

x) Xafidaaddo iyo nidaaminta diiwaannada qoraallada iyo dokumentiga Guddiga

Muqdisho, 31 Dec. 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 7 ee 1 Jan. 1989 Oggolaansho Lorag Cusub Sh.So. 500/=

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82 ee Dastuurka J.D.S. Xarafka 14aad iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969.

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Sharciga Lr. 2 ee 26 Maarso 1961 kuna saabsan Nidaamka Lacagta Soomaaliyeed.

ASAGOO TIXGELIYEY: Baahida Loo qabo in la daabaco Lacag Xaashi ah oo Cusub oo 500 Shilin Soomaali ah.

ASAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Wasiirada iyo Talada Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la soo saaro 30,000.000 xobo (soddonmalyan) oo Xaashida 500 (Shanboqol) Shilin ah qiimahee duna yahay sh.so. 15.000,000'000. (shaniyo tobanbilyan) oo ah 30 horin kana bilowda 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka (D) oo uu ka dambeeyo lambarka 001 ilaa 030.

Qodobka 2aad

Lacagta Xaashida Cusub oo 500 Shilin Soomaali ah oo Qodobka hore lagu tilmaamay waxay leedahay summadahan u gaarka ah iyo tilmaamahan xagga farsamada iyo farshaxanka oo ah sidaan soo socota:

Cabbirka 148 mm X 73 mm

Daabaca Wajiga

1. Direct Plate (3 colours)
3. Security Lithographic Printings
1. Letter Press (Including 2 red sequenti numbers' 2 Red series and blink fluore

DHABARKA: 1 Direct Plate (1 colour)

MIDABKA: 2 Security Lithographic Printings Cagaar uu La Jiro Casuur (Pink)

WARQADDA: 100%pure Linen iyo cotton rag with melami ne 85 G.S.M. 5000 M.D.F.

Oo ay wehe1iso dun plastic oo birbirqaysa

MASAWIRADA WAJIGA: Masawiro ku saabsan Kallumeysiga Summadda Qaranka.

DHABARKA: Muqaalka Masaajidka isbahaysiga islaamka

QORAALADA WAJIGA: Warqadda Wajigeeda kor laga soo bilaabo laa hoos waxaa ku qoran ereyadaan BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, Lambarka Xeerka MJD oo Lagu oggolaaday Lacagtan, tirada qiimaha lacagta «500 SHILIN» dhexda waxaa ku qoran ereyga «GUDOOMIYE» Hoostiisana saxiixa Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya M.M.Nur, Waxaa ku xiga ereyga Lacaghayaha Hoostiisana saxiixa Lacaghayaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Xasan Cilmi Barkhadle Lambarka horinta oo Isdabajoog ah wuxuu ku yaal kor dhanka Midig iyo hoos Dhanka Bidix, Geeska Isdhaafi waxaa uga qoran iyaqo af Soomaali iyo af Ingiriis ah qiimaha Lacagta iyo ereyada «SHILIN—SHILLINGS».

DHABARKA: Dhabarka Warqadda dhanka Midigta waxaa ku yaal Goobaabin midab khariir ah leh oo uu ku jiro «Watermarka» oo ah masawirka madaxa geesigii Maxamed Cabdulle Xasan.

Afarta Gees waxaa ku qoran qiimaha Lacagta oo af Carabi iyo af Ingiriis ah.

Dhanka kore waxaa ku qoran ereyga «BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA» oo af Carabi iyo Ingiriis ah.

Muqdisho, 1 JAN. 1989.

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta

Jaalle A. J. Barre.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 6 Jan. 1989 Bil. ladMaar Ah Ee Hawlkarnimo Lagu Maamusay Jaalle Axmed Ismaaciil Cabdi.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta..

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraalladii iyo Warbixintii mada xa Wafdiga G/J/Hoose iyo J/Dhexe ahna Wasiir kuxigee nka Wasaaradda Shaqada, Isboortiga iyo Arrimaha Bulshada.

MARKUU TIXGELIYEY: Sidii J/le Axmed Ismaaciil Cabdi Guddoomiyaha Beesha Dujuuma uu u beeneeyey warbixintii Ajnabigu ka qoray Degmadaas oo an in aan waxba ka bixi karin Cusboodaraeed, iyo isagoo tabahar geliyey dadka xoogga jen ee Beeshaas, Tijaabadii ugu horreysay Waxaa lagu beeray Basal jagu qiyaasay 800 boqol kilowaal.

MARKUU TIXGELIYEY: Iney Lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey nlyad sami, Hawl Adduur, Hawl Jaceyl iyo Qaabaqabsi, Kana qayb qaatay guddoomada Degmada Qaranka, looga reebo haad wax ku bol ah.

MARKUU DHEGEYSTAY: Talaua Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAYAA

QODOBKA KALIYA

Xeerka Soo Socda:

Waxaa Lagu maamusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO AH J/le Axmed Ismaaciil Cabdi G/Beesha Dujuuma.

Xeerkani Wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. Soo Saxiixo.

Muqdisho, 6 JAN. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 9 ee 6 Jan, 1989 BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO LAGU MAAMUSAY J/le G/SARE CABDULLAAHI DIIRIYE JAAMAC.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 65 ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta.

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraalladii iyo Warbixintii Guddoomiyaha Guddiga is dhaafsiga Maxaabiista Soomaaliya iyo Itoobiya, ahna Wasiir kuxigeenka W/Arrimaha Gudaha.

MARKUU TIXGELIYEY: Sidii J/le G/Sare Cabdullaahi Diiriye Jaamac uu wax uga qabtay Arrimaha is dhaafsiga Maxaabiista Soomaaliya iyo Itoobiya.

MARKUU TIXGELIYEY: Iney Lama huraan tahay in qaaka ku shaqeeyey niyad sami, Hawlkarnimo dheeraad ah iyo Daacadnimo, kana qayb qaatay Guddoomiyaha Hawlaha Qaranka, Looga reebo raad wax ku ool ah.

MARKUU DHEGAYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

QODOBKA KALIYA

Waxaa Lagu maamusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO AH J/le G/Sare Cabdullaahi Diiriye Jaamac.

Xeerkani Wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. Soo Saxiixo.

Muqdisho, 6 JAN. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE

TALOOYIN ISGAARSIIN OCE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Mustafa Clsmaan Kuusoow;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 792753, kuna qoran magaca Mustafa Cusmaan Kuusoow sida ku cad warqadda Lam. 13780 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 792753 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca Mustafa Cusmaan Kuusoow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа in ay siiso J.le Mustafa Cusmaan Kuusoow lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Maxamed Maxamuud Xasan;

HADDU UTIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1379089 oo laga sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bang'ga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1379089 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Maxamed Axmed lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Maxamuud Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Khadiijo Cosoble Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lam kala yihiin sidan hoos ku qoran:-

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
0221747	500 000	Nafisi	Geedi	Santuur	2aad Xamar
0221748	500.000	»	»	»	»
0221749	500.000	»	»	»	»
0221750	500.000	»	»	»	»
0221751	500 000	»	»	»	»
0221752	500 000	»	»	»	»
0221753	500 000	»	»	»	»
0221754	500.000	»	»	»	»

laga sameevey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh So. 4 000 000 kuna qoran magaca Nafisi Geedi Santuur sida ku cad wargaadda lam 0371 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh So. 4 000 000 kuna qoran magaca Nafisi Geedi Santuur lagana sameevey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga ivo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Khadiijo Cosoble Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 4 000.000 oo ah bedelkii Jeegagga W. oo kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 31

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Mire Cali Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1207566 oo laga sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh So 100 000 kuna qoran magaca Daahir Cumar Jimcaale sida ku cad warqadda lam. 0397 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1207566 kuna jirto lacag dhan Sh So. 100.000 kuna qoran magaca Daahir Cumar Jimcaale lagana sameevey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jl. Mire Cali Cosoble lacagta cadadeedu tahay Sh So 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yaryn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 32

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdulqaadir Sheekh Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kyd L. 12854 oo laga sameevey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 113.299 06 kuna qoran magaca Cabdulqaadir Sheekh Maxamed sida ku cad warqadda lam. 00012 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka L. 12854 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 113.299.06 kuna qoran magaca Cabdulqaadir Sheekh Maxamed lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulqaadir Sheekh Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 113.299.06 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 33

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Cusmaan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0233301 laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 142.760 kuna qoran magaca Soomaali Airlines sida ku cad warqadda lam. 0283301 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0283301 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 142.760 kuna qoran magaca Soomaali Airlines lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Cusmaan Maxamed lacag ta cadadkeedu yahay Sh.So. 142.760 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 34

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Istarliin Muuse Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1168982 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100,000 ku qoran magaca J.le Istarliin Muuse Axmed sida ku cad warqadda lam. 0544 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jilib;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1168982 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Jilib kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca Jaalle Istarliin Muuse Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Jilib in ay siiso J.le Istarliin Muuse Axmed lacagta caddeedu tahay Sh.So. 100,000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 35

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 15ka Feberaayo 1989 L. 1 R 2

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxbooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — KUKUNKA: Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya guddaheeda — qiibaddeedana waa Shs. 500. Kukunka 1 aweyniisbo wuxuu ka dhaadhaa 1 jaamaayo. Qiimaha qoritaankii F.K. hadii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Kukunka iyo qoritaankii waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xaafiska Canshuurana ee Wasaaradda Lacagta.

KOOB NIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 2 ee 26 Jan. 1989, Sharciga Mihnadda gaarka ah ee Takhaatirta, iyo Xannaanada Xoolaha. Bog; 60

SHARCI L. 3 ee 26 1989, Fasaxid soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka X/ha. » 65

SHARCI L. 4 ee 26 Jan. 1989, Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha » 67

SHARCI L. 5 ee 26 Jan. 1989, Sharciga Badda Soomaaliyeed. » 68

SHARCI L. 6 ee 26 Jan. 1989, Fasaxid adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda. » 69

SHARCI L. 7 ee 26 Jan. 1989, Oggolaansho Ba

SHARCI L. 8 ee 26 Jan. 1989, Fasaxid Furitaan Caymis gaar ahaaneed (Priyate Insurance) » 71

SHARCI L. 9 ee 26 Jan. 1989, Soo dejinta daawada dadka iyo qalabka C/dka. » 72

SHARCI L. 10 ee 26 Jan. 1989, Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 73

QAYBTA LABAAD

■ ■ ■ ■

W. M.

QAYBTA LABAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 27.1.89, Lumid 2 J/War. ku qoran Xakimo Xuseen Caddan L. 29. » 74

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 27.1.89, Lumid J/War. L. 0761612 ku qoran Xaawo Jaamac Xirsi L. 30 » 75

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.1.89 Lumid Buug Kayd L. 18747 ku qoran Asli Axmed Khayre L. 31 » 76

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.2.89 Lumid J g W. L. D37955 ku qoran Xasan X. Xuseen L. 32 » 77

MAXKAMADDA G. NUGAAL 18.1.89 Lumid Jeeg War. L. 1185376 ku qoran Muumino Saciid Cali L. 33 » 78

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.12.88 Lumid Jeeg War. L. 0761803 ku qoran Cabdulqaadir Muues Caraale L. 34 » 79

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.12.88 Lumid 2 Jeeg ku qoran Aamina Cusmaan

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

Sharci Lambar 2 Tr. 26 Jan. 1989 Sharciga Mihnadda Gaarka ah ee Takhaatiirka Caafimaadka & Xan/da Xolaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Fasixidda Furitaanka Mihnadda Takhaatiirta Xoolaha

Waxaa La fasaxay furitaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhaatiirta Caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha iyo ka talo bixinta dhaqmada habboon ee Xoolaha (Consultance).

Qodobka 2aad

Ujeeddada Fasaxidda Furitaanka

Ujeeddada Furitaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimadu waxay tahay in lagu baahiyo Xoolo dhaqatada Soomaaliyeed daaweynta iyo Xannaanada Xoolaha.

Qodobka 3aad

Dadka Loo Oggol Yahay Mihnadda

Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada Xoolaha waxaa ku shaqaysan kara Takhaatiirta Dawladda, waqtiyada kA baxsan saacadaha shaqada iyo kuwa iskood u madax banaan ee oofiya shuruudaha ku tilmaaman qodobada soo socda:

Qodobka 4aad

SHURUUDO

Qofka Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada ku shaqaynaya waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku taxan:

b) Waa in uu Soomaali yahay.

t) Waa in uu haystaa Shahaado Jaamacadeed (Laurea) ee daaweynta ama Xannaanada Xoolaha oo Dalka Laga aqoonsan yahay.

j) Waa in uu leeyahay khibrad Takhtarnimo oo aan ka yareen 5 sano oo uu ku kasbadav Dalka gudihisa ama dibeddiisa

Qodobka 5aad

Takhtarka Xoolaha iyo Xannaaneyntooda ee buuxiya shuruudaha sharcigan ku tilmaaman (qodobka hore) ee raba In uu ku shaqeeyo Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada, wuxuu Wasiirka Xannaanada Xoolaha u qoranayaa codsi. Codsiga waa in lagu soo lifaaqaa.

I) Laba Sawir.
II) Nuqulka Shahaaddada Jaamacadda iyo haddii uu Leeyahay Shahaado/Diploma Takhasus.
III) Qoraal gaar ah oo tilmaamaya goobta iyo rugta Shaqo iyo tas hiilaadka yaala.

Qodobka 6aad

OGGOLAANSHO

1. Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo daaqa, ka dib markuu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta Takhaatiirta ee Wasaaradda, ayna u sugnaato in codsadaha ay u dhammeystiran yihiin shuruudaha sharcigani tilmaamayo, wuxuu u oggolaanayaa Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada Caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha.

2. Wasiirku wuxuu codsiga ku diidi karaa go'aan sababeysan, ka dib markuu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta, waxaana go'aanka la gaarsiinayaa codsadaha muddo 15 maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda go'aanka.

Qodobka 7aad

RUQSADDA GOOB SHAQO «SHATI»

1. Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada iyo Caafimaadka Xoolaha waxaa loo qaadanayaa ruqsad goob shaqo (Shati).

2. Dawladda Hoose waxay Takhtarka ruqsad u siineysaa:
b) In uu furto rugta sare u qaadidda tayada iyo teknoloji-yada Xoolaha iyo digaagga (attivita, sootecniche).
t) In uu furto rug cafimaad ama bukaan socod (vet. clinie)
3. Dawladda Hoose waxay ruqsadda goob shaqo siin kartaa Takhtarkii haysta fasaxa Wasiirka ee ku tilmaaman qod

Qodobka 8aad
QAABKA RUGTA

1. Rugta Lagu fulinaayo shaqada Takhtarnimada waa In ay noqotaa mid xagga farsamada, dhismaha iyo degaan kaba u qalanta Mihnadda.

2. Rugtu waa in ay ugu yaraan qol baaris, qol maqaasiin daawo, musqul. waana in uu lahaadaa deyr wareegsan.

Qodobka 9aad

DAAWOOYINKA & QALABKA SHAQO EE GAARKA AH

Takhtarka Caafimaadka Xoolaha ama Takhtarka Xannaanada Xoolaha wuxuu dibedda ka dirsan karaa daawooyin gaar ah qalab ama bivological chemicals ee baahidiisa shaqo oo aan heer ganacsi geli karin waana in looga helaa ruqsad Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 10aad

Cinwaanka goob shaqo iyo Diiwaangelinta Xoolaha.

1. Takhtarku wuxuu warbixinnadiisa, codsiyada iyo tilmaamaha daawada (ricetta medica) iyo wixii kale ee shaqada la xiriira u sameynayaa waraqo gaar ah oo ku daabacan magaciisa iyo cinwaanka goobta shaqo.

2. Wuxuu kaloo sameynayaa diiwaan lagu qoro xoolaha ha hukaan socodka ah ee lagu eego ruqtiisa

Qodobka 11aad

Khidmadda Takhtarka

Khidmadda Takhtarku ku fulinayo hawlihiisa waxaa Lagu soo saarayaa Xeer Wasiir

Qodobka 12aad

Fasax ka Qaadid

1. Fasaxa Wasaaradda ee Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada waxaa laga qaadayaa Takhtarkii.

b) Ka soo bixi waaya shuruudaha bixinta ruqsadda Mihnadda.

t) uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo reebaya xil Guud oo xirfadda la xiriirta.

j) ku xad gudub anshaxa Takhtarnimada (vet. ethics)

2. Fasax ka qaadidda waxaa lagu guddoominayaa go' aan sababeysan oo Wasiirku soo saaro, isagoo dhegeystay talada Guddiga.

Qodobka 13aad
Diiwaanka Mihnadda

1. Waxaa jiraya diiwaan lagu magacaabo diiwaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

2. Diiwaanka waxaa lagu qorayaa magaca takhtarka oo buuxa, shahaadooyinkiisa, taariikhda fasaxa la siiyey, goo bta iyo hadba isbeddelka ku dhaca iyo wixii kale oo tilmaamo ah, Mihnaddana khuseyn kara.

Qodobka 14aad
Guddiga Diiwaan-gelinta iyo Kormeerka.

1. Wasaaradda waxaa laga dhisayaa guddiga diiwaangelinta iyo Kormeerka, Wasiirka ayaana magacaabaya sannadkiiba hal mar waxaana laga dhex xulayaa takhaatiirta waayo aragnimada leh ee Dalka.

2. Guddigu wuxuu talo ka bixinayaa.

b) codsiyada Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

t) Anshax-marinta Takhaatiirta ku shaqeeya Mihnada

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu talo toos ah ka soo jeediyo goobta shaqo ama Takhtarka uu u arko inuu san buuxineynin shuruudaha sharcigan ku tilmaaman, una gudbiyo Wasiirka si looga qaado tallaabada ku habboon.

4. Guddigu wuxuu yeelan doonaa xoghayn.

Qodobka 15aad
ANSHAX-MARINTA

1. Awoodda Anshax-marinta waxaa leh Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa wuxuuna guddoominayaa marka uu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta & Kormeerka ee Wasaaradda

2. Takhtarkii ku xad gudba tilmaamaha sharciga lagu jideeyey, haddii uusan falkiisu keeneynin dembi ciqaab ai ama ka joojin Minnadda Takhtarnimada ee gaarka ah waxaa Lagu ganaaxayaa sh.so. 10.000 illaa sh.so. 15.000 Haddiise Takhtarku isla dembigaas uu mar kale ku laabto, waxaa lagu joojinayaa Minnadda gaarka ah muddo aan ka yareen 6 bil ood illaa hal sano.

3. Lacagta ganaaxa ah waxaa lagu shubayaa khasnad da dhexe ee Dawladda.

Qodobka 16aad
XEER WASIIR

Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolana, Dhirta iy Daaqa waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saa ro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya Minnadd gaarka ah ee Takhtarnimada Caafimaadka iyo Xannaanad Xoolaha, isagoo ahowraya sharciyan iyo shuruucda kale e saameeya Minnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

Qodobka 17aad
BURIN SHARCI

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda am aan la socon karin Sharciyan.

Qodobka 18aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa Isla marka uu saxiix Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafint Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci lambar 3, taariikh 26 Jan. 1989: Fasaxid soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Fasaxidda ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha

Waxaa ganacsatada gaar ahaaneed loo fasaxay soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladda

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa iyadu waxay si sinnaan ah ula tartami kartaa Ganacsatada gaar ahaaneed.

Qod. 3aad

Ujeeddada fasaxidda

Ujeeddada fasaxidda soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha waxaa loogu daneynayaa xoolo dhaqatada Soomaaliyeed iyadoo lagu baahinaayo daawada iyo qalabka xoolaha Gobollada Dalka oo idil.

Qod. 4aad

Shuruudaha fasaxidda

Qofka loo fasaxay soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku qoran:

a) Waa inuu haystaa shatiga keenidda iyo dhoofinta (Import-export license).
b) Waa in uu leeyahay meel ku habboon dhigashada daawada;
t) Waa in uu ganacsaduhu ka keenaa daawooyinkaas xoolaha Shirkad ama Hay'ado muctarif ah oo ka dii-

waan gashan Dawladaadda.

Qod. 5aad

Guddiga diiwaangelinta iyo kormeerka

Waxaa la abuuray Guddiga Diiwaangelinta iyo Kormeerka oo ka tirsan Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 6aad

Shuruudaha Diiwaangelinta

1. Qof kasta oo doonaya in uu soo dejiyo kana ganacsado daawada iyo qalabka xoolana waa in laga diiwaan geliyaa Guddiga Diiwaangelinta iyo Kormeerka Ganacsiga Daawada iyo Qalabka Xoolana ee Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, waana inuu haystaa rukhsad guud ee ganacsi (shati).

2. Diiwaangelinta qofka ganacsadaha ah wuxuu bixinayaa lacag dhan 10,000/= (toban kun) Shilin Soomaali oo ah kharajka diiwaangelinta (REGISTRATION FEE).

Qod. 7aad

Xeer Wasiir

1. Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha, liiska daawada xayiran, Xubnaha Guddiga diiwaangelinta iyo Kormeerka, isagoo dhawraya Sharciga iyo Shuruucda kale ee la xidhiidha Daawada iyo Qalabka Xoolaha.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod 8aad

Burin

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 9aad

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 26 Jan 1980

Sharci lambar 4, taariikh 26 Jan. 1989: Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shac biga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qor kastaba ka ganacsan karo, Dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba, hargaha iyo saamana.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan ah ula tartamayaan Ganacsatada gaar ahaaneed.

Qod. 3aad

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya ka ganacsiga hargaha iyo saamaha.

Qod. 4aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadd Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 5, taariikh 26 Jan. 1989: Sharciga Badda Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shac biga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Sharciga Badda Soomaaliyeed ee halkan ku lifaaqan.

Qod. 2aad

Waxaa la burivey Sharciga Badda lambarkiisu yahay 1 ee 21 Febraayo 1959 iyo Sharci kasta ama Xeer-nidaamive kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa lixdan maalmood kad dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6, taariikh 26 Jan. 1989: Fasaxid adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda;

MADAXWEYNAHA JDS

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qof kasta ka ganacsan karo Adeegyada Gaadiidka Badda iyo Hawlaha Maraakiibta.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh ula tartamayaan Ganacsatada gaar ahaaneed ee ku hawlan adeegyada gaadiidka Badda iyo hawlaha maraakiibta.

Qod. 3aad

1. Shuruudaha fasaxidda, awoodda kormeer iyo jiheyn ee Hay'adaha Dawladda ee Hawlaha Adeegyada Gaadiidka Badda iyo Maraakiibta waxaa lagu qeexi doonaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 4aad

1. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda waxay ku yeelaneysaa Adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda iyo Hawlaha Maraakiibta awood hubineed, kormeer iyo jiheyn oo lagu qeexi doono Xeer uu soo saaro Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 5aad

Waxaa la buriyey Sharci kasta oo ka sco horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 7 Tr. 26 Jan. 1989 Oggolaasho Bankiyo Gaar Ahaaneed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa Laga furi karaa Bankiyo gaar ahaaneed (Private Banka).

Qodobka 2aad.

Furitaanka Bankivada ku tilmaaman qodobka hore waxaa Oggolaanaya Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta, isagoo dhege ystay talada Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

Qodobka 3aad

Bankiga Dhexe ee Soomaaliveed wuxuu ku xeelanayaa Bankivada kor ku xusan awood baariseed kormeer iyo iibeyn ee ku tilmaaman Xeer sharci lambar 6 ee 19 oktoobar 1968 oo Loo ragay sharci lambar 27 ee 26.11.1968 iyo beddelaaddii ka danbeysay.

Qodobka 4aad

Waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharcigan wuxuu dhagan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 26 Jan 1989.

MADAXWEYNAHA JDS.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 8 Tr. 26 Jan. 1989 Fasaxid Furitaan Ceymis gaar ahaaneed (Private Insurance).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dalka J.D.S. Waxaa laga furi karaa. kana hawl geli kara Ceymisyo gaar ahaaneed (Pricate Inusrance).

Qodobka 2aad.

Furitaanka Ceymisvada ku tilmaaman qodobka hore waxaa fasixi kara Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta.

Qodobka 3aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh ula tartamayaan Ceymisyada gaar ahaaneed.

Qodobka 4aad

1. Shuruudaha fasixidda, awoodda kormeer iyo iihevn ee Dawladda ee Ceymisvada gaar ahaaneed waxaa laqu qeexi doonaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda & Lacagtu.

2. Xeer Wasiirka waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 5aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda amaaan la socon karin sharcigan.

Qodobka 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 9 Tr. 26 Jan. 1989 Soo dejinta Daawada Dadka iyo qalabka Caafimaadka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la fasaxay soo dejinta daawada dadka iyo qalabka Caafimaadka.

Qodobka 2aad.

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh u la tartamayaan ganacsatada gaar ahaaneed.

Qodobka 3aad

Qofka loo fasaxay soo dejinta daawada dadka iyo qalabka Caafimaadka waa in uu iska diiwaan geliyaa Wasaaradda Caafimaadka.

Qodobka 4aad

Waxaa la abuuray guddi diiwaan-gelin oo ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka, xubnihiisuna ku soo bixi doonaan Xeer Hoosaad iu soo saaro Wasiirka Caafimaadka.

Qodobka 5aad

Shuruudaha diiwaangelinta, kormeerka iyo baarista kee nidda daawada dadka iyo qalabka caafimaadka waxaa lagu tilaftiri doonaa xeer hoosaad uu soo saaro W/Caafimaadku.

Qodobka 6aad

Waxaa la burjyey sharci kasta oo ka soo hor jeedo ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 7aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sharci Lambar 10 Tr. 26 Jan. 19 9 Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashana Golaha Shacbiga WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qof kastaba ka ganacsan karo Dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, faleenka iyo Xabkaha.

Qodobka 2aad.

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan ah ula tartamayaan ganacsatada gaar ahaaniee.

Qodobka 3aad

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiran ama habeynaya ka ganacsiga faleenka iyo xabkAhA

Qodobka 4aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xakiimo Xuseen Cadaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 0265175-0764817 laga sameeyey Laamaha Saad iyo Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 145.000 iyo Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Xakiimo Xuseen Cadaan sida ku cad warqadda lam. 0786 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortalmento) Jeegagga War. Lam. 0265175-0764817 kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 195.000 kuna qoran magaca Xakiimo Xuseen Cadaan laga la sameeyey Laamaha Saad iyo Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Xakiimo Xuseen Cadaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 195.000 ii an bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markii ay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Xaawo Jaamac Xirsi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0761612 Laga sameeyay laanta laad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 50,000 kuna qoran magaca Xasan Maxamuud ku cad warqadda Lr. 0791 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta laad.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0761612 ku na jirto Lacag dhan sh.so. 50,000 kuna qoran magaca Xasan Maxamuud Hayl lagana sameeyay L/laad ee Bankiga Ganac siga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/laad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed In ay siiso J/le Xaawo Jaamac Xirsi Lacagta Cadadkeedu ta hay sh.so. 50,000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan ma rkii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood Laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ra- smiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.1.89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Dr. Muuse Axmed Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 18747 oo laga sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 386.873,84 kuna qoran magaca Asli Axmed Khayre sida ku cad warqadda lam. 0042 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 18747 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 386,873,84 kuna qoran magaca Asli Axmed Khayre lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Dr. Muuse Axmed Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 386,873,84 oo ah bedelkii Buugga Kaydka oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii intaa ka hor aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 31

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdul-qaadir Muuse Caraale;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu lumay Jeeg War. Lam. 0761803 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 28.500 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale si-Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar:

da ku cad warqadda lam. 14945 ee Bangiga Ganacsiga iyo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0761803 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 28.500 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale la-cagta cadadeedu tahay Sh.So. 28.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markav ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 34

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xasan X. Xuseen Macalin;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. D 37955 laga sameeyey Laanta Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca Xasan X. Xuseen sida ku cad warqadda Lam. ——— ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. D. 37955 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca Xasan X. Xuseen Macalin lagana sameeyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xasan X. Xuseen Macalin lacagta cadadeedu tahay Sh. So. 400.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 32

MAXKAMADDA GOBOLKA NUGAAL
QAYBTA MADANIGA EE GAROOWE

MGN.G./7/89 Tr. 18.1.89
MGN.G./10/89

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Nugaal markuu arkay; Tixraac Taar lambar aan lahayn taariikh, 1.9.88 iyo tixraac Taar taariikh. 11.1.89 ee ka soo baxay Laanta Bangiga Ganacsiga Laanta Garoowe ujeedadoodana tahay Jeeg lumay, lambarkiisu yahay 1185376 ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh. So 100.000 kuna qoran magaca Muumino Saciid Cali Garsooraha Maxkamadda Gobolka Nugaal Haddii Arkay Qod. 69 ee Sharciga 2aad Tr. 9.9.1962:

HADDUU ARKAY: Xaqiijinta Jeegga lumay ayna xaqiijiyeen Bangiga Ganacsiga Laanta Garoowe;

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Nugaal wuxuu soosaaray Amarkaan:

1. In Jeegga lumay lagu qoro Faafinta Rasmiga ah;

2. Inuu bixiyo Bangigu lacagtii ku qoraya Jeegga lumay; Lr 1185376 ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 100 000 in Jeeggaas la baabi'iyo ama la tirtiro lacagtii ku qoranaydna Bangigu bixiyo. Haddii aan Jeeggaas la qaadan ama la isticmaalin ama ayaan imaan waxyaalo kale oo hor istaag ah, laguna bixiyo muddo aan ka yarayn 15 casho ka dib markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah; haddii inta ka horreysa la helo Jeeggaas wax ishortaag ah ma jiraan: waxaana la noqon karayaa amarkaan; ah in Jeegga la tirtiro.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Nugaal Garoowe
(Sh. Cabdulaahi Macalin Daahir)

L. 33

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Cusmaan Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 079130 iyo Jeeg Wa.r Lam. 079331, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 60.000 kuna qoran magaca Aamina Cusmaan Faarax sida ku cad warqadda lam. 14943 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xaruuta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga wareega oo lam. 079130 iyo J.W. Lam. 079331 laga saareeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Laanta Xaruuta, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 60.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Cusmaan Faarax, ayna ku kala qoran yihiin jeeg walba lacagta dhan J.W. Lam. 079130 ku qoran lacagta dhan Sh. So. 30.000 J.W.Lam. 079331 ku qoran lacagta dhan Sh. So. 30.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruuta in ay siiso lacagta caddaykeedu yahay Sh.So. 60.000 oo ah bedelka Jeegagga War. ee kor ku xusan, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faalinta Rasmiga ah ee JDS, haddii aan inta ka horreysa aan wax is horjaag ah ka imaanin la keenin.

Muqdisho, 17.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 35

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY BAYDHABO

L.M.G.B./20/89 BAYDHABO, Tr. 29.1.89

UJEEDDO BAAFIN JEEGAGGA WAREEGA OO LAMBARRADOODA KALA YIHIIN:-

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BAY

MARKUU ARKAY: Arjiga codsiga ee uu soo qortay J.le Xasan Maxamed Sheekh Ibraahim ee Tr. 28.1.89 kuna saabsanaa Baafinta Jeegagga Wareega ee ay Lambarradooda hoos ku qoran yihiin;

MARKUU ARKAY. Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 N. 2, ee Lumidda Jeegagga Wareega ee Lambarradooda kala yihiin:- 1) J.W.L. 027264, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (shan boqol oo kun), 2) J.W.L. 0272605, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (shan boqol oo kun), 3) J.W.L. 717327, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 18.500 (toban kun iyo shan boqol oo shilin oo ku wada qoran magaca J.le Cali Macalin Maxamed Iagana wada sameeyey Laanta Wardhiigley oo ay taariikhdooduna wada tahay 14.1.89 isu geyna guud ee lacagaha ku qoran Jeegagga Waa 1.018.500 (Hal mal yan iyo toban iyo siddeed kun iyo shan boqol. Sidaa Awgeed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaggaas ka dib markii ay ka soo wareegto mudco 30 maalmood, oo ka bilaabata maalinta Dekereetada lagu shaaciyo ama Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, isla markaana in Jeegagga cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro codsadaha sare ku xusan ama qof asaga ka sita Wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

GUDDOOMIYAHA M.G.BAY
(Aadan Wardheere Cali)

L. 36

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 26ka Feberaayo 1989 L. 2 R 2

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxbooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaneeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qumana qoritaanku F.R. haikii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 11 ee 9 Feb. 1989, Oggolaansho Meel marinta Axdiga Saddexaad ee Qaramada Bog; Midoobey ee Xeerka Badda. 85

QTYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 10 ee 1 Feb. Magacaabid Wasiiro iyo Wasiiro ku Xigeen. » 86

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 11 ee 1 Feb. 1989, Magacaabid Madaxda Ciidammada » 87

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 12 ee 1 Feb. » 88
1989, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Miisaaniyadda Sannadka 1989ka.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 13 ee 27 Feb. » 89
1989, Magacaabid Nooraayo.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 14 ee 9 Feb. » 90
1989, Meel-marinta Axdiga Qaraamadda Mi-qoobay ee Xeerka Bauda.

DECREE No. 14 on 9 Feb. 1989, Instrument of » 91
ratification.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha, L. 1 ee 13.2.89 » 92
Aqoonsi Urur Samafalka Halgan.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.2.89, Lumid » 93
2 Jeeg War. ku qoran C/naasir Maxamed Aadan L. 37

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.2.89 Lumid » 94
Jeeg War. L. 1009040 ku qoran Maxamed Yoonis Warsame L. 38

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE 8.2.89, Lumid » 95
Buug Kayd L. 1579 ku qoran Xuseen Rooble Maxamuud L. 39

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89, Lumid » 96
Jeeg War. L. 0303729 ku qoran Cusmaan Xuseen Cali L. 40

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.2.89, Lumid » 97
Buug Kayd L. 28922 ku qoran Cawil Axmed Faarax L. 41

MAXKAMADDA G. MUDUG 7.2.89, Lumid 6 » 98
Jeeg War. ku qoran Maxamed Cali Jaamac L. 42

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 3.12.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Xaliimo Jaamac Maxamuud L. 44 » 100

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.2.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Shirkadda Soomaali Airlines L. 45 » 102

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.2.89 Lumid Jeeg War. L. 1022935 ku qoran Maxamed Faarax Barre L. 46 » 103

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Axmed Aadan Bakaal L. 47 » 104

MAXKAMADDA G. MUDUG 7.1.89 Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Yaasiin Maxamed Aadan L. 48 » 105

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.1.89 Lumid Jeeg War. L. 0273587 ku qoran Soomaali Airlines L. 49 » 107

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0852510 ku qoran Cabdullaahi Cabdi Maxamed L. 50 » 108

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0800620 ku qoran Maxamed Maxamuud Xuseen L. 51 » 109

LUNA AFRICA BOTLING COMPANY, Isugu yeerid Shir Saamileyda Shirkadda L. 52 » 110

MAXKAMADDA G. BANAADIR 23.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0279005 ku qoran Xaaji Abuukar Maxamed L. 53 » 111

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0832009 ku qoran Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar L. 54 » 112

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 11, taariikh 9.2.1989: Oggolaansho Meelmarinta Axdiga Saddexaad ee Qarammada Midoobay ee Xeerka Badda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Axdiga Saddexaad ee Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha oo ka dhexeeya Dawladaha meelmariya Axdiga.

2. Axdigan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Axdiga ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Qod. 308 ee isla Axdigaas.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Axdigani.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 9.2.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QTYBTA LABAAD

X E E R

Xeer Madaxweynaha JDS L. 10 ee 1.2.1989: Magacaabid Wasiirro iyo Wasiirro Ku-xigeen.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 7aad, Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 kuna saabsan wax ka beddelilda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 iyo beddelaadvadii ka dambeeyey, kuna saabsan nidaamka Dhismaha Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: Dib u habeynta qaab dhismeedka Ciidammada Qalabka Sida gaar ahaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliveed iyo baahida loo qabo in loo magacaabo Wasaaradda Gaashaandhigga Wasiir cusub iyo Wasiir ku-xigeen;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay laqama maarmaan tahay in dib loo soo celiyo dhismaha Wasaaraddii Dalxiiska 3 Jaalle S/Gaas Aadan Cabdullaahi Nuur: Wasiirka Dalxiiska;

4 Jaalle Dr. Maxamed Cabdi Yuusuf: Wasiir Ku-xigeen

loona magacaabo Wasiir iyo Wasiir Ku-xigeen:

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaaliyaasha soo socda waxaa loo magacaabay xilka mid walba ku hoos qoran:

1 Jaalle Dr. Xuseen Sheekh Cabdiraxmaan: Wasiirka Gaashaandhigga;

2 Jaalle S/Guuto Maxamed Saciid Yirsi: Wasiir Ku-xigeen;

Qod 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 1.2.1989

MADAXWEYNAHA JDS

Xeer Madaxweynaha JDS L. 11 ee 1.2.1989: Magacaabidda Madaxda Ciidammada Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka; JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Dib u habeynta qaab dhismeedka Ciidammada Qalabka Sida, gaar ahaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, lagama maarmaanna ay ugu muuqatay in loo magacaabo Talisyada Xoogga Dalka Soomaaliyeed Taliyeyaashii hoggaamin lahaa;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaallayaasha soo socda waxaa loo magacaabay xilalka mid waliba ku hor qoran:

1. S/Guuto Maslax Maxamed Siyaad: Taliyaha Ciidanka Lugta;
2. S/Guuto Maxamed Nuur Dhude: Taliyaha Ciidanka Cirka;
3. Admiraal Guuto Saciid Cabdalla Cumar: Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha iyo
4. S/Guuto Siyaad Daa'uud Gudaal: Taliyaha Ciidanka Difaaca Cirka.

Qod. 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 1.2.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 12 ee 1 Feb. 1989: Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Miisaaniyadda Sannadka 1989ka:-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Dekreetada Sharciga ee soo baxday 23kii Dishembar 1961, Lr. 2 Amarka Maamulka Xisaabaadka;

ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20 Marso 1965 L. 13 Xeer nidaaminta Abaabulidda Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriirey iyo wixii beddelaad gashay;

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahan yahay Sarkaal shaqaale loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca: Agaasimayaasha Guud-Xafiisyada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamay sharcigii Lr. ahaa 1 ee 4.1.68, iyadoo uu siinayo awood Maamulidda, qardeysiga ku tala gelidda kharashka shaqo socodsiinta, isku duwidda iyo soo bandhigidda Xisaabaadka la gareysan karo kuna saabsan qareedada (soo hormarin) la sameeyo, oggolaashada Ruqsadda Dhoofka Safarrada Dibedda iyo gunnadaba.

D E K R E E T A:

Sarkaal la yiraahdo Jaalle Maxamed Xaaji Cabdi (Faartaag» — Darajo A/2 Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta MJDS, waxaa loo magacaabay Sarkaal wakiileed kharashka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacagta MJDS iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, laga bilaabo 1da Jannaayo 1989ka.

Dekreetadan waxay dhaqan galeysaa haddatan isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Feb. 1989

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 15
Muqdisho. 1 Feb. 1989

Xeer Madaxweynaha JDS L. 13 ee 27 Dis. 1988: Magacaabid Nootaayo.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qod. 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Nootaayo qofku mudan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Ibraahim Cusmaan Mursal Maxamed waxaa loo magacaabay Nootaayo, wuxuuna hawshuisa Nootaayonimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 27.12.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 14, taariikh 9.2.1989: Meelmarinta Axdiga Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 11 ee 9ka Febraayo 1989 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Axdiga Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Axdigan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Axdiga Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha iyo Lifaaqyadiisa oo lagu saxiixay magaalada Montego Bay ee Dalka Jamaa'ka 10kii Disember 1982.

Qod. 2aad

Axdiga kor ku tilmaaman ee Xeerka Badaha iyo Lifaaqyadiisu waxay Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaan awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 9.2.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 14, of the 9th Febraury 1989: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: he Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 11 of the 9th February 1989 on the base of which the People's Assembly has approved the Convention specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Convention.

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article 1

The United Nations Convention on the Law of the Sea and its Annexes, signed in Montego Bay, Jamaica, on the tenth day of December 1982, is hereby ratified.

Article 2

The above mentioned Convention and its Annexes shall have the force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon be published on the Official Bulletin of the State.-

Mogadishu, 9.2.1989

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 1 ee 13.2.1989 Aqoonsi Urur Samafalka Halgan.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee Lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54. 2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah.

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Ab uurista Ururada Noocani ah.

WUXUU GUDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Halgan oo ah Urur Samafal, Ujeeddadiisuna tahay Gurmadka iyo Daryeelka Dadwaynaha Soomaaliyeed ee ku nool J.D.S Gobolladeena markay ay la kulmaan xaaladaha adag oo ay sababeen Aafooyinka Dabiiciga ah.

Qodobka 2aad

Ururku wuxuu saldhigiisu noqonayaa magaalada Muqdisho wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobolada iyo degmooyinka Dalka.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Waasiiku Arrimaha Gudaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.2.89.

Wasiirkaa Arrimha Gudaha
Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR

QAYBT AMADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdinaasir Maxamed Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0799507-0147802 laga sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So 50.000 iyo Sh.So 20 000 kuna qoran magaca Cabdinaasir Maxamed Aadan sida ku cad warqadda Lr. 1465 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lam. 0799507-0147802 kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 70.000 kuna qoran magaca Cabdinaasir Maxamed Aadan lagana sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Cabdinaasir Maxamed Aadan Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 70.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yar rayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Aadan Habane Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1009040 Laga sameevay L/laad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga Iyo keydka Soomaaliveed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Yoonis Warsame Sida ku cad Warqadda Lr. 1467 ee Bankiga Ganacsiga Iyo keydka Soomaaliveed Qeybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortemento) J/War. Lr. 1009040 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Yoonis Warsame lagana sameevay L/laad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliveed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/laad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliveed in ay siiso J/le Aadan Habane Maxamed Lacagta Cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daahaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Jaddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 12.2.1989.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

T. 38

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE MARKA

MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

MARKUU ARKAY: Buugga Keydka Lr. 1379, Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qornoyd Lacag dhan sh.so. 174.950/ (Boqol todobatan & Afar kun iyo sagaal boqol iyo konta) Shillin. uuna lahaa Xuseen Rooble Maxamuud sida ku cad Warqadda Lam. Yahay 000056 Tr Tahay 4 2 89 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka. HH HHH

MARKUU ARKAY: Qod 69 ee Sharciga Lr yahay 9 Tr. 11 9 1965 No. 2

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B./Keydka Lr. 1379, Kuna qoran magaca Xuseen Rooble Maxamuud, ayna ku jirto Lacag dhan sh.so 174 950 (Boqol todobaatan iyo Afar kun. Sagaal boqol iyo konton) Shilin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedelo Xuseen Rooble Maxamuud, Buugga kor ku Tilmaaman una sameeyo mid la mid ah, ka dib markii ay ka soo wareegato muddo dhan 15 maalmood gudahood maalinta go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax ishortaag ah.

GUDDOOMIYAHA M. G. SH/HOOSE
(Saylac Sheekh Cumar)

L. 39

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cawad Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0303729 oo laga sameeyay L/Wardhigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed, kuna jirto Lacag dhan sh.so. 386.000 kuna qoran magaca Cusmaan Xuseen Cali sida ku cad warqadda Lr. 1334 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0303729 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 386.000 kuna qoran magaca Cusmaan Xuseen Caci lagana sameeyey L/Wardhigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed In ay siiso Maxamed Cawad Cali Lacagta cadaadeedu tahay sh.so. 386.000 oo ah baddelkii J/War. kor kuxusan mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax si hortaag ah Laga keenin.

Muqdisho, 7.2.89.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 40 WW

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray Cawil Axmed Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: n uu lumay Buug Kayd Lam. 28922 laga sameeyey Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 13.746.46 kuna qoran magaca Cawil Axmed Faarax sida ku cad warqadda lam. 0078 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

n la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lam 28922 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 13.746.46 kuna qoran magaca Cawil Axmed Faarax lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cawil Axmed Faarax lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 13.746.46 oo ah bedelkii Buug Kaydka oo kor ku xusan markii ay kawareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenii.

Muqdisho, 4.2.1989

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Axmed Xaashi.

L. 41

GUDDOOMIYAHA M.G. MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 7.2.89, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaalieed Laanta Gaalkacyo Kuna soo muujiyeen inay Jeegagga Wareega oo hoos ku qoran ay ka lumeen Jaalle Maxamed Cali Jaamac;

HADDUU ARKAY: Lambarrada Jeegagga Wareega ee uu Bangiga Ganacsiga ku soo tilmaamay ama ku qoray warqaddiisa taariikhdiisu kor ku xusan tahay, laguna caddeeyey in Jeegaggaasi sharci ahaan uga wareegeen gacanta Jaalle Maxamed Cali Jaamac, ayna ka lumeen baafin guudna laga sameeyey;

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer sharci Lr. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In la baafiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan oo lumay kalana ah:-

1. J.W.Lr. 1308647 ee la qoray 22.12.88,	Sh. So. 100.000
2. J.W.Lr. 1308648 ee la qoray 22.12.88,	Sh. So. 100.000
3. J.W.Lr. 1395862 ee la qoray 26. 1.89	Sh. So. 100.000
4. J.W.Lr. 1395863 ee la qoray 26. 1.89	Sh So. 100.000
5. J.W.Lr. 1395864 ee la qoray 26. 1.89	Sh. So. 100.000
6. J.W.Lr. 1395860 ee la qoray 26. 1.89	Sh. So. 100.000

WUXU UAMRAYAA OO KALE

In Jaallahaas loogu beddelo Jeegag cusub oo u dhigma kadib markii amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto muddo (30) soddon maalmood ah, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Maxamed Cali Jaamac amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 7.2.1989

GUDDOOMIYAHA M. G. MUDUG

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA M.G. MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 12.2.89, kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo kuna soo muujiyeen inuu Jeegga Lam. 1396156 ee la qoray taariikhda 29.1.89 uuna leeyahay Jaalle Axmed Cali Maxamed ka lumay, isagoo Jeeggaasi laga sameeyey Bangiga Laanta Gaalkacyo, kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqol kun);

HADDUU ARKAY: In Jeegga Lambarkiisu kor ku xusan laga diray baafin.

WUXUU AMRAYAA

In la baafiyo Jeegga Lambarkiisu sare ku qoran yahay.

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer Sharci anaa Lr. 2 soona baxay 9.9.1965tii.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In Jaallahaas loogu beddelo Jeeg cusub oo u dhigma kii ka lumay, kadib markii amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ahee Dowladda, ayna ka soo wareegto muddo (30) soddon maalmood ah, waaa nin Jeegga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Axmed Cali Maxamed amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 13.2.1989

GUDDOOMIYAHA M. G. MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hiloowle Cali)

L. 43

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, HARGEYSA

MGH/33/88 3.12.88

UJ. Degreeto cusboonaysiin J.W.Lr. 0088426, 18.4.88 Sh. So. 500.000 iyo 0088427, 18.4.88 Sh.So. 300.000 labaduba ku qoran yihiin Xaliimo Jaamac Maxamuud lagana sameeyey labadaba Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Xaliimo Jaamac Maxamuud 27.11.83 kuna codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee kor ku xusan oo ka lumay;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa Laanta 3aad ee Lambarkiisu yahay 39 lana qoray 27.11.88 ee Bangigu ku soo caddeeyey in Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay iska leeyihiin astaamaha ujeedada ku xusan, loo kala diray laamihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Hargeysa Laanta 3aad Lr. yahay 39 ee 30.11.88 ee lagu soo caddeeyey Jeegagga iyaga ah;

MARKUU ARKAY: In Lacagta ku qoran Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay iska leedahay Xaliimo Jaamac Maxamuud;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo loona cusboonaysiiyo Xaliimo Jaamac Maxamuud cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ma ciddii ay

awood buuxda u soo siiso ee ka haysata awood buuxda mud-do 15 beri ah gudahood.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga ivo Kay-dka Hargeysa in uu Nuqul Go'aankan ka mid ah ku dheiivo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ay uga soo qorato cabasho haddii ay doonayaan.

Guddoomiyaha Max G W/Galbeed Hargeysa

(Maxamed Yuusuf Cavnaan)

Kaaliyaha Max G W Galbeed Hargeysa

(Axmed Wacays Maxamed)

L 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Yaxye Xaaji;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0301947-0301948 laga sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 142.800 isugeyn Sh.So. 285.600 kuna qoran magaca Shirkadda Soomaali Airlines, sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga lam. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'ivo (Ammortamento) Jeegagga War ee Lam. 0301947-0301948, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 285 600 kuna qoran magaca Shirkadda Soomaali Airlines lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, in ay siiso Jaalle Saciid Yaxye Xaaji lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 285.600 oo ah bedelkii Jeegagga War. markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal mood laga bilaabo maalinta go'aankan laqu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 45

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Barre Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War Lam. 1022935 oo laga sameeyey Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna iirto lacag dhan Sh. So 100 000 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Barre sida ku cad warqadda lambar 1513 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boorame:

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9 9 1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 1022935 kuna jirto lacag dhan Sh.So 100 000 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Barre lagana sameeyey Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Axmed Barre Maxamuud lacagta qaddeedu tahay Sh.So 100 000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax [illegible] ah laga keenin.

Muqdisho 13.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 46

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Aadan Bakaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lambarradoodu hoos ku taxan yihiin kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna kala qoran J.le Cawaale Diiriye Xirsi iyo J.le Xasan Diiriye Xirsi, sida ku cad warqadda lam. 1263 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, waana sidatan:-

0744068	50.000	» » »	»
0744069	50.000	Xasan Diiriye Xirsi	4/Xamar
J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1387613	100.000	Cawaale Diiriye Xirsi	4/Xamar

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku qoran yihiin laga sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magacyada J.le Cawaale Diiriye Xirsi iyo J.le Xasan Diiriye Xirsi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, in ay siiso J.le Axmed Aadan Bakaal lacagta ca-dadkeedu dhan yanay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA RACFAANKA GOBOLKA MUDUG

MR/GM/5-1/88 Gaalkacyo, 7.1.1989

Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Mudug

MARKUU ARKAY: Codsiga Yaasin Maxamed Aadan oo uu Ku Sheegay in ay ka lumeen Jeegagga Wareega ee ay Lambarradoodu kala yihiin:-

1. J.W.Lam. 0930981 ee 5.12.87 Sh.So. 100.000 oo ku qoran Cabdi Daahir Cali oo laga sameeyey Laanta Gaalkacyo ee lagu bixiyo.

2. J.W.Lam. 1015175 ee 3.2.88 Sh.So. 100.000 oo laga sameeyey Laanta Gaalkacyo.

3. J.W.Lam. 1305486 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Max'd Guuleed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

4. J.W.Lam. 1305490 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Ma'd G leed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

5. J.W.Lam. 1305483 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Max'd Guuleed lagana sameeyey B.G.&.K. Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo.

6. J.W.Lam. 1305500 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Ma'd G leed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

7. J.W.Lam. 1183512 ee 20.11.88 Sh.So. 100.000 ku qoran Maxamed Cartan Diiriye lagana sameeyey B.G.&.K.S. Laanta Laas-caanood.

8. J.W.Lam. 071834 ee 19.9.88 Sh.So. 40.000 oo ku qoran Yuusuf Maxamed Diiriye lagana sameeyey Laanta Laas-caanood.

MARKUU ARKAY: Warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ee 5.1.1989 ee Laanta Gaalkacyo ku soo caddeysay jiritaanka Jeegaggaas lumay horeyna Laanta Berbera looga baafiyey;

MARKUU KU QANCAY: Inay doodda dacwooduhu runtahay;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69 ee Xeer Lambar 2 soona

maqan tahay Soohdinteeda;

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas kor ku xusan ee lumay la baabi'iyo bed-delkoodiina uu u sameeyo Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Ganacsade Yaasiin Maxamed Aadan oo deggan Gaalkacyo 30 maalmood kaddib marka Dekereetadan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo khaarash-ka Faafinta uu Dacwooduhu iska bixinayo.

Dekereetadan waxaa la sugay lana saxeexay maanta oo ah 7dii Jannaayo, 1989ka.

Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Mudug
(Dr. Cabdullaahi C.M. Dheegsan)

L. 48

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/ɟe Maxamed Axmed Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0273587 Laga sameeyey L/Wadaiir ee Bankiga Ganacsiga iyo kevd ka Soomaaliveed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 142.000 kuna Qoran magaca Soomaali Air Lineevs sida ku cad wargadda Lr. 0610 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliveed Laanta Wada Jir

HADDUU ARKAY: Qod 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0273587 kun

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0273587 ku. na jirto Lacag dhan sh.so. 142.000 kuna qoran magaca Soomaa ɟi Air Lineevs lagana sameeyay L/Wada Jir ee Bankiga Gana csiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wada jir ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/ɟe Maxamed Axmed Faarax Lacagta Cadaadkeedu tahay sh.so. 142.000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka ɟagu daaba co Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdulɟaahi Axmed Xaashi.

L. 49

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cabdullaahi Cabdi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0852510 oo laga sameeyey L/Xaruntа ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 25.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Cabdi Maxamed sida ku cad warqadda Lr. 1287. ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0852510 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 25.000 kuna qoran magaca C/lahi Cabdi Maxamed Lagana sameeyey L/Xaruntа ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Xaruntа ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso Maxamed C/lahi Cabdi Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 25.000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood Laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.2.89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADI

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 50 H

MAXKAMADDA GOBOLK ABANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/risaaq Xasan Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In lumay Jeeg War. Lam. 0800620, laga sameeyey Laanta Laascaanood ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100 000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Xuseen sida ku cad warqadda lam. 1676 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Laascaanood;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0800620, ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Xuseen lagana sameeyey Laanta Laascaanood, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Laascaanood ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le C/risaaq Xasan Cabdulle lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 51

LUNA AFRICA BOTTLING COMPANY
UJEEDDO: ISUGU YEERID SHIRKADDA SAMILEYDA

LUNA AFRICA BOTTLING CO.

Waxaa Laysugu Yeerayaa Samileyda In ay ugu Yimaadan Shir Weyne Loga Hadlo Arrimaha Hoose Ku Qoran Tariikhdu Markey Tahay 20.2.1989 Saacadu Tahay 16, Galabnimo Xarunta Shirkadda, haddii ay suura gal noqon weydana waxaa la qaban doonaa 1.3.89 isla saacadda kor ku qoran.

10) Xal Deg Deg ah u helid halag dhaqaale oo Shirkadda Haysta iyo dhibaatooyin la xarira.

20) Deyin lagu leeyahay bixinteda.

30) Maalgelin Cusub oo ay u bahantahay sii gobta ay ku Taal loga raro biyo La'aan awgeed.

40) Magacabid Gudi Arrimahas oo dhan xal deg deg ah u hela ee Maamul.

50) Wixi kale oo arrimaha xalkoda la xarira waa laga hadlikara go'aanna waa laga gaarikaraa.

LUNA AFRIGA BOTTLING CO.

L. 52

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Nuur Maxamuud Gaas, Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Shamiitada Berbera;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0279005 kuna qoran magaca Xaaji Abuukar Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1827 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xiisaabaha Guud, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 163.200;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0279005 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 163.200 kuna qoran magaca Xaaji Abuukar Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.lo Nuur Maxamuud Gaas, Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Shamiintada Berbera, lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 163.200 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaan ah laga keenin.

Muqdisho, 23.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 53

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Shirkadda Al-Qamar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0832009 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar, sida ku cad warqadda lam. 1285 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 2aad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0832009 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar, lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Shirkadda Ganacsiga Al—Qamar lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 54

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Xuseen Kamas Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0.05467 kuna jiro lacag dhan Sh.So. 142.760 kuna qoran ma gaca Soomaali Airleyns sida ku cad warqadda lam. 2098 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayďka Soomaaliyeed L. Xaruntа;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Annullamento) Jeeg War. L. 05.5467 laga saaleeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kayďka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna jiro lacag dhan Sh.So. 142.760 kuna qoran magaca Soomaali Airleyns.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kayďka Soomaaliyeed Laanţa Xaruntа in ay siiso Jaalle Xuseen Kamas Xasaan lacagţa ca-daadeedu ţahay Sh.So. 142.760 oo an bedelkı Jeeg War. Kor ku Xusan markay ka soo waţeegţo muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa-finţa Rasmiga ah ee JDS, haddii inţa ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

FAAFIN KASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 1da Maarso 1989 L. 3

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 12 ee 14 Feb. 1989, Heshiiska Kirada Airbas A310-300 (Credit Bail) Bog; 116

QTYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 22 Feb. 1989, Abuurjd Kuliyadda C.Q.Sida ee Jaalle Siyaad. » 118

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 16 ee 12 Feb. 1989, Magacaabid Nootaayo » 121

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA I, 2 ee 13.3.88, Aqoonsi Ururka Samafalka Istager. » 122

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.1.89, Lumid J J/War. ku qoran Ibraahim Maxamed Cali L. 56 » 130

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 28.2.89, Lumid B/Keyd L. 3213 ku qoran Faay Dheere Qumane L. 57 » 137

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED 8.2.89, Lumid 6 J/War. ku qoran Ismaaciil Xaashi Diirjye L. 58 » 138

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid Jeeg War. L. 0272368 ku qoran Xasan Maxamed Cariif L. 59 » 139

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid Jeeg War. L. 0296158 ku qoran Ibraahim Cali Gaaboow L. 60 » 140

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.2.89, Lumid Jeeg War. L. 1184269 ku qoran Aamina Maxamuud Baaruud L. 61 » 141

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.3.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xasan Cabdi L. 62 » 142

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 12 ee 14 Feberaayo 1989, Heshiiska Kirada Airbus A310-300 (Credit Bail).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka iyo Xeer Njdaamiyaha Lagu Dhisay Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed iyo Sharci Lamb. 2 ee 17 Disembar 1979 habeynta Sharciga Somali Airlines.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 5 ee 5ta Nofembar 1966 (sharciga Canshuuraha Macaashuul Macaashka) Xeer Madaxweynaha Lr. 109 ee 14ka Nofembar 1973 (Ujuurada Maxkamadaha Qodobada 313-315 ee Xeer habka madaniga (Aqoonsiga Xukuunada Shisheeye), Qodobka 681 ee Xeerka Madaniga (la wareegid milkiyad).

MARKUU TIXGELIYEY: In Somali Airlines haysaato fursad ay kula gasho heshiis kiro iib ee Dayuurad nooca AIRBUS A310-300.

MARKUU TIXGELIYEY: Heshiiska maalgelinta ee Somali Airlines kula geleyso Sharikad caalami ah ee Lacageed kuna saabsan hashiis kiro-iib ee Dayuurad AIRBUS A310 300 oo milkiile ka noqon doonto kaddib markii ay dhameystirto kiro bixinta.

MARKUU TIXGELIYEY: Inay tahay lagama maarmaan In macaamilkaas loo fidiyo canshuur dhaaf iyo wax ka bedelid shuruucda kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaadiidka Cirka Iyo Dhulka. Oggolaanshada Golaha Wasiirada iyo Golaha Shacbiga Qaranka.

WUXUU SOO SAAREY SIARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad CANSHUUR DHAAF

Kireeyaha Dayuuradda Nooceedu yahay AIRBUS A310-300 Farsamo taxan Lr. ———Diiwaan Lr. ———Waxaa laga

waangelinta, canshuuraha furdada) oo hadda jira ama soo baxa mustaqbalka kana soo baxa Dawladda Dhexe Ama Dawladda Hoose.

Haddii hay'ad Lacageed oo kale la wareegto mowqifka Kireeyaha ee Dayuuradda la tilmaamay, waxaa si toos ah Loo aqoonsanayaa canshuur dhaafkaan.

Qodobka 2aad LA WAREEGID (EXPROPRIATION

Dayuuradda Airbus ee ujeedada sharcigaan loolama wa reegi karo dan guud awgeed tan iyo illaa qiimaheeda oo dhan Laga siiyo kireeyaha taasoo waafaqsan heshiiska kirada.

Qodobka 3aad KA DHAAFID DIBAAJIGA MAXKAMADAHA

Kireeyaha ama hay'ad kasta Lacageed oo la wareegta mowqifka kireeyaha Dayuuradda AIRBUS oo tilmaanteedu ku qoran tahay qodobka koowaad ee kore waxaa laga dhaafay dibaajiga Maxkamadaha oo la bixiyo marka dhinac uu dacwo oogayo.

Qodobka 4aad AQOONSIGA XUKUNKA DIBADEED

Iyadoo wax laga bedelayo xeerka madaniga iyo xeerka habka madaniga waxii dacwo ah oo ka dhasho tariiqada iyo fulinta heshiiska kirada ee kor ku xusan waxaa lagu garnaqayaa Maxkamadaha iyo shuruucda dalka laga diiwaangeliyey dayuuradda oo labada dhinac isku waafaqeen iyadoo Maxkamadaha Soomaailveed aqoonsan doonaan xukunka Maxkamadahaas oo lagu soo saaro sifo sharcigaas waafaqsan toosna wey u dhaqangelin doonaan xujo la'aan iyo dib u dhageysi la'aan.

Qodobka 5aad BURIN SHARCI

Waxaa la burivey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama La socon karin qodobada kor ku qoran.

Qodobka 6aad DHAQANGELIN

Sharcigaan wuxuu dhaqangelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 14 Feb. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 22 Feb. 1989 Abuurid Kulliyadda C.Q. Sida ee Jaalle Siyaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad Faqradda 14aad ee Dastuurka J.D. Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad Sharciga Lr. 15 ee 6.4.60 ku saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Qod. 13aad Sharci Lr. 14 ee 3.6.62 ku saabsan Dhismaha Dawladda.

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida Loo qabo in Dalka Gudihiisa lagu diyaarjyo Saraakiil aqoon iyo aragti mideysan u leh hoggaaminta C.Q. Sida.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaaraddada Gaashaandhigga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

DHISMAHA KULLIYAD.

B) Waxa la dhisay Kulliyadda C.Q. Sida ee J/le Siyaad

1) Kulliyaddu waxa lagu Tababarayaa Layli Saraakiisha ku soo biiraysa C.Q.S. si kor loogu qaado tayadooda iyo Aqoontooda.

Qodobka 2aad

Kulliyadda waxaa soo geli kara.

B) Arday Soomaali ah oo sita Shahaado ee «Dugsi Sare ama u dhiganta» Soona gutay Shaqada Qaranka.

T) Waa in da'diisuna ayan ka yarayn 18 Sano kana weyneyn 25 Sano.

J) Xulashadu waa tartan imtixaan iyo baaris Caafimaad.

X) Ardaygu waa inuu noqdaa Labood hase yeeshee Dhiddig waa la qaadan karaa haddii ay timaado baahi ka dib

Qodobka 3aad

B) Codsi ka dib, Kulliyaddu waxay qaadan kartaa imtixaan La'aan Arday Soomaali ah oo sita Shahaado Jaamacadeed, ha ahaato mid laga qaatay J.U.S. ama mid dibedda ah. Haddii ay buuxiyaan Takhasusyada ay Ciidamadu u baahan yihiin.—

T) Ardaygaas wuxuu marayaa Tababar 12-18 bilood hadba baahidu inta ay la egtahay.

J) Ardayga ku xusan Faqradda kowaad ee qodobkan waxa loo aqoonsanayaa darajada 2 (Laba) Xiddigle ka dib markii ay soo dhammeystaan Tababarka ku xusan Faqradda 2aad ee isla qodobkan.

Qodobka 4aad

ARDAYGA LOO QAATO KULLIYADDA

B) Waxa lagu magacaabayaa Layli-Sarkaal.

J) Barajo Ciidan Looma aqoonsan karo ilaa uu Layli-Sarkaalku ka soo qalinjebiyo Kulliyadda C.Q. Sida xitaa hadduu ahaa Askari.

J) Layli-Sarkaalka oo Askari ahaa hadduu Kulliyadda ka soo qalinjebin waayo wuxuu wadanayaa darajadiisii hore.

Qodobka 5aad

SANADKA WAXBARASHADA

B) Sanadka Waxbarashada Kulliyadda C.Q. Sida waa Laba Sano.

T) Barnaamijka Waxbarashada iyo qalinjebinta waxa Lagu jaangoynaya Labadaa Sano.

J) Sanadka Waxbarashada waa la soo gaabin karaa. haddii ay yimaadaan duruufo gaar ahaaneed.

Qodobka 6aad

Layli-Sarkaalku markii uu ka soo qalinjebiyo Kulliyadda waxa loo aqoonsanayaa «Xiddigle» ka tirsan Saraakiisha C.Q. Sida, wuxuu yeelanayaa Xuquuqda ay leeyihiin Saraakiisha la darajada ah.

Wuxuu kaloo qaadanayaa Shahaadadii qalinjebinta ee

Qodobka 7aad

Kulliyaddu waxay yeelanaysaa Calan leh Astaan iyada u gaar ah, sida qaybaha kale ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Qodobka 8aad

Kulliyaddu waa tan keliya ee ka jirta Dalka Gudihiisa oo Lagu Tababaro Layli-Saraakiisha ku soo buraysa C.Q.S.

Qodobka 9aad

Layli-Saraakiishii ka soo qalinjebisay Kulliyadda Xeerkan ka hor waxa lagu dhaqayaa isla Xeerkan.

Qodobka 10aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Feb. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.16 ee 12 Feb. 1989 Maga. caabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo Lr. 1 ee

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.66 2.3.1966 kuna saabsan hawlaha Nootaayaua.

oo awood u siinaya Madaxweynaha J.D.S. inuu si toos ah iyo tartan La'aan u magacaabo Nootaayo qaraxi mudan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

S/le Cabdikariin Xasan Qoroo waxaa loo magacaabay Notaayo Xamar, wuxuuna hawshiisa ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana Lagu soo saarayaa Faafinta Rasmigga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Feb.1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 2 ee 13.3.1988 AqoonsiUrurka Samafalka Istaageer Agricultural Dedelopment.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qod. 54/2 ee Xeerka madeniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.1973;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Iney lagama maarmaan tahay abuurista Ururrada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si Rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Istaageer Agricultural Development oo ah Urur Samafal, Ujeedadiisuna tahay inuu gacan ka geysto baahida Beeraleyda yar-yar si ay u kordhiyaan wax soo saarkooda dhinaca Cuntada.

Qod. 2aad

Ururku wuxuu Saldhiggiisu noqonayaa Magaalada Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 13.3.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle)

SHARCIGA HAYADA

I. MAGACA:

Hayada magaceeda waxaa la yiraahdaa Istaageer Agricultural Development, waxaana loo aqoon sanayaa «Istaageer».

II. TARJUMAD/MICNAYN:

1. Istaageer: Xaraikaan, markii Af-Soomaaliga loo eego, tastuurkaan dhexdiisa micnaha uu ku leeyahay waxaa weeye, istiirin, iscawimid iyo isu adeegid.

2. Marka sidii ay ku haboon tahay, tastuurkaan dhexdiisa labka iyo dhediga isku si ayaa loo qaadanayaa, wadar iyo waaxidna waa isku jiraan.

III. UJEEDADA HAYADA LOO ASAASAY:

Hayadaan Istaageer waxaa loo asaasay in ay gacan ka geysato baahida beeraleyda yaryar si ay u siyaadsiiaan wax soo saarkooda dhanka cuntada isku filaan shahoodana kor ugu qaadaan.

IV. HAYADA XARUNTEEDA:

Hayada xarunteeda waxay ku oolaysaa Xamar, hase ahaatee, haddii loo baahdo ama ay balaarato hayada shaqadeedu, waxaa laamo laga furi karaa meelhii ku haboon oo wadanka gudihiisaa, khaas ahaan nawaaxiga beeraha.

V. UJEEDOOYINKA HAWLEED:

Sugitaanka isku filaanta dhanka cuntada iyo wax soo saarku, waa waajibka ugu horeeya oo ummad kastaa saaran, arrintaas oo ah baahi Soomaaliya hadda ka taagan aadna uga fog dhamaystir. Hayadaan Istaageer waxay si weyn isugu taxalujinaysaa iyadoo la kaashanaysa hayadaha kale oo samafalkaa (kuwa gudaha iyo kuwa dibedaba) inay gacan ka geysato horumarinta beeraha. Hayadu waxay si khaas ah isugu taxalujinaysaa horumarinta beeraleyda yaryar, tacalinta beeraha ee beeraleyda yar yar iyo horumarinta mashruucyada yar yar.

Istaageer waxaa ujeedooyinkeeda laf dhabar u ah inay door weyn ka gasho wax ka qabashada cunta yarida taasoo ku dhisan qorsha dheer.

yinka halkaan ku qeexan.

1. Inay ka caawinto beeraleyda yar yar dhanka sharciga ee helitaanka dhulka beeraha.

2. Inay siiso hadba tabartu say tahay, beeraleyda yar yar taageero dhanka farsamada iyo talada.

3. Inay ka caawinto dhanka waraabka beeraha (kanaallo iwm.)

4. Inay ka caawinto dhanka qodida ceelasha (ceelasha gacanta).

5 Soo saarida iyo gacan ka siinta bacrinta beeraha (fertilizers).

6. Inay gacan ka siiyaan dhanka dabargoynta cayayaanka beeraha.

7 Ka taageerida qalabka yar yar ee beeraha iyo kuwa waaweynba.

8 Gacan ka siinta dhanka tacaliinta beeraha iyo tacaliinta kalaba.

9 Inay samayso meelaha lagu barbaarivo geedaha, si beeraleydu u hesho geedaha khudaartu ka baxdo iyo kuwa hooska iyo in la sameeyo barnaamij geed abuurka (forestry projects).

10 Abuurista mashruucyo yar yar oo bulshada u soo jiida dakhli dhaqaale.

11. Dhaqashada iyo xanaanada xoolaha, iyo soo saarida farmaajada iyo subaga.

12. Caafimaadka (dawooyinka, qalabka isbitaalada iyo shaybaarka).

13 Ka qayb gelida arrimaha masiiboovinka dhanka cunta yarida iyo daadadka iyo fatahaada wabiyaasha.

14 Soo saarida burjiko qoraxeedka (solar stoves) iyo dib u habaynta aluuminamka (alluminuim recycling).

15. Iyo gacan ka gevsashada iyo samafalka wixii kale oo hayad samafal ahi samayn karto sida dharka iyo buga kale oo taakulaynta dadka tabaalaysan (Anything of relief and development materials for the community).

VI. UJEEDOOYINKA IYO SHARCIYADA KALE OO HAYADA:

1. Inay hayadu wax la qabsato oo isla jir ula shaqayso

daba.

2. Inay hayadu ku darman karto hayad kale oo samafal ah, wixii lihi ah oo hayada wax ugu yaalna ay ka qaadan karto, haddii waxaasi wax Istaageer ujeedooyinkeeda waafaqsan yihiin, bulshadana wax ugu yaal.

3. Inay hayadu dhanka maaliyad kala xiriiri karto waxna ka raadsan karto hayadaha ama shaqsiyaalka gacan siiva samafalka iyadoo si sharciga waafaqsan danina ugu jirto bulshada faa'iido raadsina aysan ku jirin arrintaas u meel marinaysa.

4. Inay hayadu fuliso ujeedooyinkeeda iyadoo ku tala geleysa masuuliyadna u qaadaysa, intii karaan keeda, kharajka maamulka hayada.

5. Hayadu waxay xaq u leedahay inay ama aqbasho ama diido wixii caawimaad ah oo cid kale u soo gudbiso.

6 Hayadu waxay xisaab ka furan kartaa haday maamulka hayada ula muuqato wax loo baahan yahay bankigii ay doonto.

VII GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

1 Guddoomiye
2 Guddoomiye ku-xigeen
3 Maareeye
4 Khasnaji/xisaabiye
5 Xoghaye

Waxaa dhici karta haddii ay Asaasayaasha hayada la haboonaato inaan mararka qaarkood jagooyinkaas kor lagu soo sheegay qaarkood lagu istiqmaalin. Guddiga Maamulka hayada tiradoodu kama yaraan karto saddex (3) xubnood kama badnaan karto todoba (7) xubnood taasoo ku xiran go'aanka asaasayaasha Maamulka shaqada iyo wixii hayadu leedahay oo dhan waxaa maamulaya asaasayaasha oo adeegsan kara guddiga maamulka hayada

Si hayada shaqadeeda iyo ujeedooyinkeeda lagu fuliyo guddiga maamulka hayadu waxuu awood u leeyahay inuu qorto shaqaale u qalma shaqada waxaana lagu amaal iyo xaq marinayaa shaqaalaha sidii lagula heshiiyo Haddii ay qaadaan asaasayaasha hayadu in shaqsi shaqaalaha hayada ka mid ah ku kacay waxyaabo ka soo horjeeda danaha iyo

qaadaan ficilka ku haboon waqti xadudan.

MASUULIYADA XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

1. Guddoomiye

Guddoomiyaha masuuliyadiisu waa inuu fadhiyada ama shirarka guddiga maamulka socodsiiyo hadaan wax dhibaato shi ka hor istaagin. Waxuuna qabanayaa wixii caadi ahaan shaqo guddoomiye ah.

2 Guddoomiye ku_xigeen

Guddoomiye ku_xigeenku waxuu la shaqaynavaa Guddoomiyaha, waxuuna qabanayaa shaqada guddoomiyaha marka uu maqan yahay.

3 Maareeyaha

Maareevaha shaqadiisu waa inuu masuul ka yahay hawlaha fulinta hayada dhan kastaba ha ahaatee. waana inuu shaqada guddoomiyaha qabtaa markii loo baahdo.

4 Khasnaiiga/xisaabiyaha

Ivadoo ku xiran hadba sidii maamulku go'aansho xisaabiyuhu waxuu masuul ka yahay arrimaha lacag qabashada iyo lacag bixinta ee hayada isagoo muujinaya rasiidyada iyo fowiariska arrimahaas la xiriira. Guud ahaan xisaabiyuhu waa inuu hayaa oo kaydiyaa hayada xisaabaadkeeda, huuggeeda lacagta una divaarsho xisaabaadka bishiiba hal mar isagoo tusaya, oditarada markii loo baahdo.

5 Xoghayaha

Qabashada shaqada guud ee xoghaynta ka sokow xoghayuhu waxuu qaabilsan yahay arrimaha la xiriira koriskoondansiga, diyaarinta fadhiyada guddiga maamulka haynta iyo kaydinta go'aamada guddiga.

VIII SHIRARKA GUDDIGA MAAMULKA HAYADA:

Guddiga Maamulka hayadu uguu yaraan bishiiba hal mar bay shir veelanayaan shirkana waxaa madax ka ah guddoomiyaha markuu maqan yahayna guddoomiye ku-xigeenka, ama haday labaduba maqan yihiin maareeyaha. Markii shir la leeyahay uguu yaraan bogolkiiba konton waa inay guddiga maamulka ka joogtaa.

Qofkii ka maqnaada saddex jeer oo isku xigta fadhiga guddiga. Guddoomiyaha iyo guddiga intiisa kale ayaa go'aan

IX GUDDIGA LA TALINTA (ADVISORY COMMITTEE)

Guddiga La Talintu waxuu ka kooban yahay saddex ilaa afar qof oo labo takhasus beeraha iyo khibrad leedahay, hal dhaqaale yahan ah ama maamulka.

X. TAAGEERADA HAYADA (U FIDINTA TAAGEERO HAYADA)

Qofkii ama hayadii doontaa waa taageeri kartaa hayada, iyadoo loo eegin dhan diin, waddan, dhalasho iyo wax kale midna, haday arrintaasi waafaqsan tahay sharciga iyo ujeedooyinka hayada Istaageer. Cidii taageero bixisaa dib uma ceshan karto wax khaas ahna ma tirsan karto oo hayada taageedaa.

XI. ASAASAYAASHA HAYADA

Asaasayaasha oo xubno ka noqon kara, guddiga la talinta iyo kan Maamulka labadaba, waxay ahaanayaan kuwa leh go'aan kama danbaystaa ee wax alla wixii la xiriira arrimaha hayada. Wixii ka hor imaanaya danaha iyo ujeedooyinka hayada waa joojin karaan. Asaasayaashu waa agaasin joogtaa ee hayada ilaa ay ka geeriyoodaan.

13 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Axmed Jaamac L. 430 » 767

MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.11.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran C/qaadir Nuur Axmed L. 431 » 768

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.10.89 Lumid Jeeg War. L. 0996233 ku qoran Cismaan Canshuur Cabdale L. 432 769

MAXKAMADDA G. BANAADIR 21.11.89 Lumid Jeeg War. L. 1888677 ku qoran Faadumo Cabdi Maxamuud L. 433 » 770

MAXKAMADDA G. BANAADIR 23.11.89 Lumid Jeeg War. L. 1729087 ku qoran Cabdiraxmaan Axmed L. 434 » 771

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.10.89 Lumid Jeeg War. L. 0484930 ku qoran Warsame Barre Axmed L. 435 » 772

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.11.89 Lumdi Jeeg War. L. 0218614 ku qoran Sahra Maxamed Sheekh L. 436 » 773

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.11.89 Lumid 2 Jeeg War ku qoran Axmed Maxamuud Geedi L. 437 » 774

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.11.89 Lumid Jeeg War. L. 152343 ku qoran Maxamed Aadan Ciise L. 438 » 775

MAXKAMADDA G BANAADIR 23.11.89 Lumid Jeeg War. Lr. 1105811 ku qoran Shacni Xuseen Cilmi L. 439 » 777

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.9.89 Lumid Jeeg War. L. 0092744 ku qoran Jaamac Nuur Maxamuud L. 440 » 778

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.12.89 Lumid Treval Sheque Lam. 102.4200-715.347361 ku qoran Cumar Axmed Cabdulle L. 441 » 779

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.12.89 Lumid Jeeg War. L. 1967478 ku qoran Sureer Yuusuf Jaamac L. 442 » 780

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.12.89 Lumid Buug Kayd L. 4351 ku qoran Faadumo Saalim Cawad L. 443 » 781

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.12.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Drs. Faadumo Cali Saciid L. 444 » 782

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.11.89 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Caasha Ceeljoog Nuur L. 445 » 783

MAXKAMADDA G BANAADIR 9.11.89 Lumid Jeeg War. L. 0375999 ku qoran C/raxiin Maxamuud Cusmaan L. 446 » 784

MAXKAMADDA G. BANAALIR 7.11.89 Lumid Jeeg War. L. 1944435 ku qoran Maxamed Cali Axmed L. 447 » 785

MAXKAMADDA G. BANAADIR 15.11.89 Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Maxamed Nuur L. 448 » 786

SHIRKADDA KAAH PHOTOGRAPHIC SUPPLIES, 30.11.89 Ogeysiis Fadhi Shir Caadiah L. 449 » 787

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 35, ţaariikh 1.11.1989: Oggolaansho ku biirid-da Heshiiska Caalamiga ah iyo Borotokoolka la xiriira badbaadinta dadka ee Badda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday ku biiridda Jamhuuriyadda Di-moqaraadiga Soomaaliya Heshiiska Caalamiga ah ee badbaa-dinta Dadka Badda ee 1974 iyo borotokoolka la xiriira ee 1978.

2. Heshiiska waxaa lagu go'aansaday magaalada LON-DON marka sannadku ahaa 1974.

3. Heshiiska iyo Borotokoolkuba waxay noqonayaan qayb ka mid ah Sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska iyo Borotokoolka qodobka sare lagu tilmaamay, waxaa dhaqan-gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska iyo Borotokoolkiisaba.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meel-mariyo Heshiiska iyo Borotokoolka kor ku ţilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu sa-xiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faa-finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.11.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 36, taariikh 1.11.1989: Oggolaansho ku biiridda Heshiiska iyo borotokoolka la xiriira ka hortagga wasakhaynta biyaha badda ee ka yimaada maraakiibta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo sacdo:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday ku biiridda JDS Heshiiska Caalamiga ah ee la xiriira ka hortagga wasakhaynta Biyaha Badda ee ka yimaada maraakiibta ee 1973 iyo borotokoolka la xiriira ee 1978.

2. Heshiiska waxaa lagu go'aansaday magaalada LONDON sannadka marka uu ahaa 1973.

3. Heshiiska iyo Borotokoolkuba waxay ka mid noqonayaan Sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska iyo Borotokoolka qodobka sare ku tilmaaman waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska iyo borotokoolkiisaba.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska iyo Borotokoolka kor ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.11.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD
X E E R

Xeer Madaxweynaha JDS L. 65 ee 29.10.89: Billad Maamuus «Commendatore» Mr. G.R. Arshad.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dast rka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Koowaad ee Golaha Wasiirrada iyo ta Safiirka JDS u fadhiya Islaamabaad;

MARKUU TIXGELIYEY: Mr. G.R. Arshad oo u ah Qunsul Sharaf J.D.S. ee Magaalada Karashi (Pakistan) oo si daacadnimo ah ugu adeegay danaha Ummadda Soomaaliyeed, soo dhoweynta iyo kaalkaalinta Wufuuddeena, faafinta iyo kor u dhigidda sumcadda Soomaaliyeed isagoo ku bixiya kharaj aan yareyn sannad-guurada Kacaankeena iyo isagoo u sameeya dacaayad gaar ah sidii Sharikadaha Pakistaan ay uga qayb geli lahaayeen Carwada Caalamiga ah ee lagu qabto Muqdisho taasoo uu ku guuleystay;
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami is kaashi iyo horumarinta labada Ummadood la guddoonsiiyo Aqoonsiga uu ka mudan yahay Ummadda Soomaaliyeed iyo Dawladdaba, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAMUUS «COMMENDATORE» Mr. G.R. ARSHAD oo u ah Qunsul Sharaf J.D.S. ee magaalada Karashi (Pakistan).

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 29.10.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 66 ee 29.10.89 Billad Qalin ah Hawlkarnimo lagu maamuusay Jaalle Maxamed Faarax Yuusuf.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta,

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Taliyaha Saldhigga 1aad JDS B/BERA (TIR/TS1/ 115/6.12.88);
MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka dheeraadka ah uu muujiyey Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera Jaalle Maxamed Faarax Yuusuf muddadii uu hawl galka ka socday Gobolladaas muujiyeyna Hawlkarnimo Dheeraad ah oo aan ka hooseynin midka qoriga ridaayo hawshiisana marna ka tegin;
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami, hawl jacayl iyo daacadnimo, kana qayb qaatay gudashada hawlaha Qaranka, looga reebo raad wax ku ool ah.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD QALIN AH EE HAWLKARNIMO Jaalle MAXAMED FAARAX YUUSUF, Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 29.10.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 67 ee 29.10.1989: Billad Qalin Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Hay'adda Mashruuca Fidinta Beeraha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Hoggaanka Dhaqaalaha Golaha Dhexe XHKS (XHKS/HDH/1954/89 ee 6.8.1989);

MARKUU TIXGELIYEY: Mashruuca Fidinta Beeraha tallaabada ay ka qaadday sidii lagu horumarin lahaa beeraha Bariiska ee Gobolka Sh/Dhexe iyo natiijada wacan ay ka gaartay kobcinta soo saarka Bariiska;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Hay'adda ku shaqeysay niyad sami, hawl jacayl iyo mintidnimo, kana qayb qaadatay gudashada hawlaha Qaranka, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerkan soo socda:

Qodobka Keliya

Waxa lagu maamuusay BILLAD QALIN HAWLKARNIMO AH MASHRUUCA FIDINTA BEERAHA.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 29.10.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 68 ee 29.10.89: Billad Maar ah Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Hay'adaha: Mashruuca Baara Weyne, Wakaaladda Horumarinta Beeraha ADC), Wakaaladda Cagaf—Cagafyada iyo Hawlaha Beeraha (ONAT), Guddiga Xisbiga ee Degmada Jowhar, Guddiga Maamulka ee Degmada Jowhar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Guddoomiyaha Hoggaanka Dhaqaalaha Golaha Dhexe XHKS (XHKS/HDH/1954/89 ee 6.8.1989);

MARKUU TIXGELIYEY: Hay'adaha hoos ku qorani doorka weyn ay ka qaateen sidii lagu horumarin lahaa Beeraha Bariiska ee Gobolka Sh/Dhexe iyo natiijada wacan ay ka gaareen kobcinta soo saarka Bariiska;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in Hay'adda ku shaqeysa niyad sami, hawl abuur, hawl jacayl iyo mintidnimo, kana qayb qaadatay gudashada hawlaha Qaran, looga reebo raad wax ku ool ah.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerkan soo socda:

Qodobka Keliya

Waxa lagu maamuusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO AH Hay'adaha: Mashruuca Baara-Weyne, Wakaaladda Horumarinta Beeraha (ADC); Wakaaladda Cagaf-Cagafyada iyo Hawlaha Beeraha (ONAT), Guddiga Xisbiga ee Degmada Jowhar, Guddiga Maamulka ee Degmada Jowhar.

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 29.10.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre

Xeer Madaxweynaha JDS L. 69 29.10.89: Billad Maar Hawlkarnimo lagu maamuusay Jaalle Cabdullaahi Macallim Yuusuf (Bulsho).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Hoggaanka Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Golaha Dhexe XHKS HW/2070/87 ee 12.7.87);

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka dheeraadka ah uu muujiyey Jaalle Cabdullaahi Macalim Yuusuf «Bulsho» oo ah Hawlwadeen Sare Xisbiga muddadii uu joogay Xisbigana wuxuu muujiyey Hawlkarnimo, Daacadnimo dheeraad ah, wuxuu kaloo yahay kaadir dhab ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Iney lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Niyad sami, hawl-abuur, hawl jaceyl iyo daacadnimo, kana qayb qaatay gudashada Hawlaha Qaranka, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO JAALLE CABDULLAAHI MACALIM YUUSUF« Bulsho» oo ah Hawlwadeen Sare XHKS.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 29.10.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 70 ee 8 Nof. 1989: Magacaabid Wakiilka Sharci ee Dawladda Soomaaliyeed ee Shirkadda GISOMA.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 1148/120 ee 11.5.1987 oo ku saabsan hoggaaminta iyo maareynta mashaariicda lagu hirgeliyey kaalmada Dawladda Mashaariicdaas;

MARKUU ARKAY: Qoraalka Nootaayaha Xamar lambar Rep ee Febraayo 1988, laguna aasaasay SHIRKADDA GISOMA ee naaxinta xoolaha oo ay isku baheysteen Dawladda JDS oo leh 49% iyo Sharikadda GISA oo leh 51%;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in qaab sharci loo magacaabo Wakiilka sharci ee saamiyada Dawladda Soomaaliyeed ay ku leedahay Sharikadda ISKU DHAFKA Beeraha iyo Xoolaha ee GISOMA (SPA);

WUXUU GUDDOONSHAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Inj. MUNYE SACIID CUMAR, Maareeyaha Guud ee Mashruuca Soomaaliyeed ee Kalluumeysiga Badweynta «SHIFCO» waxaa loo magacaabay Wakiilka Sharci ee Soomaaliyeed Saamiyada Dawladda ay ku leedahay Sharikadda ISKU DHAFKA Beeraha iyo Xoolaha ee GISOMA (SPA).

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8 Nof. 1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 71, taariikh 1.11.1989: Meelmarinta oggolaanshaha ku biiridda Heshiiska Caalamiga ah ee ka hortagga wasakheynta biyaha badda ee ka yimaada maraakiibta iyo borotokoolkiisa.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidadda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 35 ee 1.11.1989 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman iyo borotokiisaba;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in oggolaashaha ku biiridda Heshiiskan la meelmairyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey oggolaanshaha ku biiridda JDS Heshiiska Caalamiga ah ee la xiriira ka hortagga wasakheynta biyaha badda ee ka yimaada maraakiibta oo lagu go'aansaday magaalada LONDON sannadka markuu ahaa 1973 iyo borotokoolka la xiriira ee 1978.

Qod. 2aad

Heshiiska iyo Borotokoolka ku tilmaaman Qodobka sare waxay Dalka JDS ku yeelanayaan awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.11.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 72, taariikh 1.11.1989: Meelmarinta oggolaanshaha ku biiridda Heshiiska Caalamiga iyo Borotokoolkiisa ee la xiriira badbaadinta Dadka ee Badda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 36 ee 1.11.1989 Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ku oggolaaday ku biiridda Heshiiska iyo Borotokoolka Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in oggolaanshaha ku biiridda Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey oggolaanshaha ku biiridda JDS Heshiiska Caalamiga ah ee la xiriira badbaadinta Dadka ee badda oo lagu go'aansaday magaalada LONDON sannadka markuu ahaa 1974 iyo Borotokoolka la xiriira ee 1978.

Qod. 2aad

Heshiiska iyo Borotokoolka ku tilmaaman Qodobka sare waxay Dalka JDS ku yeelanayaan awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.11.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 73 ee 4 Nof. 1989: Magacaabid Maareeyaha Guud ee Mashruuca Kalluumeysiga Badweynta «SHIFCO».

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 1148/120 ee 11.5.1987 oo ku saabsan hoggaaminta iyo Maareynta Mashaariicda lagu hirgeliyey kaalmada Dawladda Talyaaniga iyo magacaabidda Maareeyaha Guud ee Mashaariicdaas;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay, xag sharci, in si gaar ah loo magacaabo Maareeyaha Guud ee SHIFCO oo ka mid ahayd mashaariicda sare ku tilmaaman, haddana gooni isu taagtay, billowdayna wax soo saar;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Inj. Muunye Saciid Cumar waxaa loo magacaabay Maareeyaha Guud ee Mashruuca Kalluumeysiga Badweynta «SHIFCO».

Qod. 2aad

Ilaa inta looga sameynayo Mashruuca nidaamkiisa maamul u gaarka ah, Maareeyaha Guud waxaa la siiyey awood maamul caadi ah iyo mid aan caadi ahayn oo la siman kuwa ay leeyihiin hay'adaha Dawladda ee madax bannaan.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Nof. 1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 74 ee 15.11.89: Magacaabid Noo-taayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan Hawsha Sotaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2. 1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah u magacaabo Notaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiir-ka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAN

Qod. 1aad

Jaalle Aamina Maxamed Cabdi waxa loo magacaabay Notaayo, waxayna hawsheeda Notaayanimo ku fulineysaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15.11.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 23 ee 4 Nof. 1989: Aqoonsi Ururka Samafalka Hay'adda Daryeelka Baahida Dadweynaha (S.P.S.) Social Public Services.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qod. 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka iyo Barnaamijka lagu dhisay Ururkaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocaasi ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka (S.P.S.) Social Public Services; Hey'adda Daryeelka Baahida Dadweynaha, ujeedadiisuna tahay inuu gacan u fidiyo danyarta, isla markaana ka kaalmeeyo dhinacyada Caafimaadka, Waxbarashada, Tababarrada Haweenka sida dhar toildda iyo xirfado kale, qodista ceelasha iyo wixii la mid ah.

Qod. 2aad

Ururku wuxuu saldhiggiisu noqonayaa magaalada Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 4.11.1989

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla)

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 24 ee 23.11.89 Aqoonsi Hay'adda Daryeelka Dadka Siidaama.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu Aasaasay Ururkaasi;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Hay'adda Daryeel ka Dadka Siidaama oo ah Urur Samafal oo ujeeddadiisu tahay la socodka xaaladda nololeed ee dadka; ayna sameeyaan Daraasado la xiriira Caafimaadka, Waxbarashada iyo wax soo saarka dhinaca Beeraha, Abuurid ilo dhaqaale oo wax u tara dadweynaha Reer Siidaama.

Qod. 2aad

Hay'adda Daryeelka Dadka Siidaama waxay saldhiggiisu noqonayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 23.11.1989

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla)

QAYBTA SAD/XAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

N A A D O D H U L

Waxaa la-caddeynayaa in J.le Xasan Ismaaciil Faahiye uu soo qortay Arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 2.5.1989 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisu yahay Retthangolare Addimihiisuna yihiin mt. 20X30 kuna fadhiya Mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koonfur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Nof. 1989

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 413

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA M/DHULKA RASMIGA
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le G/Sare Mire Awaare Jaamac uu soo qortay Arji Qaybta dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 13.10.89 uu ku weydiistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X50 kuna fadhiya 1,500 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul

Koofur waxaa ka xiga: Dhul

Galbeed waxaa ka xiga Dhul

B a r i waxaa ka xiga: Jid cadde.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Nof. 1989

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 414

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA M/DHULKA RASMIGA
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Saciid Xaaji Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoo se ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 29.8.1972 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimi_ hiisuna yihiin mt. 20X30 kuna fadhiya Mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul

B a r i waxaa ka xiga: Dhul

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Nof. 1989

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 415

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Maxamed Isaaq Ibraahim;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. lam 1963694 ilaa 1963699 kuna qoran magaca J.le Maxamed Isaaq Ibraahim lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar, Jeegaggaas oo midkiiba ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000.

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1963700	100.000	Maxamed Isaaq Ibraahin	5aad
1963751	100.000	» » »	»
1963752	100.000	» » »	»

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee soo baxay 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War ee kor ku qoran lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna qoran guud ahaan lacagta dhan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Isaaq Ibraahin.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Isaaq Ibraahin lacagta cadadeedu dhan tahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, hadd iiinta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Sh. Maadeey)

L. 416

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Yaasiin Maxamuud Weyrax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lambaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	ShSo.	Magaca ku qoran			Laanta
606943/52	50.000	Yaasiin	Maxamuud	Weyrax	L/caanood
606957	5.000	»	»	»	»
606958	5.000	»	»	»	»

oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 60.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Maxamuud Weyrax;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lam. kor ku qoran yihiin kuna jirto lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 60.000 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood, kuna qoran magaca J.le Yaasiin Maxamuud Weyrax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood in ay siiso J.le Yaasiin Maxamuud Weyrax lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 60.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Sh. Maadeey)

L. 417

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Daryeelka Naafada;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1084435 laga sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiag Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1084435 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna oqran magaca Maxamuud Warsame Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Daryeelka Naafada lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 418

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xarunta Dhaqan Celinta Naafada;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumeen Jeegagga War. ee Lambaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
1885199	100.000	Maxamuud	Cusmaan	Maxamuud	3aad
1885290	100.000	»	»	»	»
1885201	100.000	»	»	»	»
1885202	100.000	»	»	»	»
1885203	100.000	»	»	»	»
1095936	40.000	»	»	»	»
1677743	100.000	C/llaahi Yuusuf Faarax			Wadajir

laga sameeyey Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Kod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Laamaha kor ku tilmaaman ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 640.000 kuna kala qoran magacyada Maxamuud Cusmaan Maxamuud iyo C/llaahi Yuusuf Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan Xarunta Dhaqan Celinta Naafada lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 640.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 420

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Ismaaciil Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 0517360—0517373 kuna qoran magaca Shariif Abuukar Ibraahim lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar ayna ku jirto lacag dhan 500.000 Sh.So. midkiiba guud ahaan 7.000.000, Jeegag War. Lam. 0532825—0532832 kuna qoran magaca Cabdullaahi Ismaaciil Maxamed lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar ayna ku jirto lacag dhan 500.000 Sh.So. midkiiba guud ahaan Shs. 4.500.000, Jeegag War. Lam. 0527327—0527330 kuna qoran magaca Cabdullaahi Ismaaciil Maxamed lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar ayna ku jirto lacagta dhan 500.000 Sh.So. midkiiba guud ahaan Sh.So. 2.000.000, sida ku cad warqadda lam. 12194 ee Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran oo ay guud ahaan ku qoran tahay lacagta dhan Sh. So. 13.500.000 kuna kala qoran magacyada Shariif Abuukar Ibraahim iyo Cabdullaahi Ismaaciil Maxamed lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 2aad Xamar iyo 3aad Xamar.

WAXAA L AAMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Cabdullaahi Ismaaciil Maxamed lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 13.500.000 oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.10.1989

KU/S. GUDDOOMIYAHA MGB
(Cabdullaahi Xersi Cumar)

L. 421

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Cusmaan Cawad;

HADDUU TIXGELIYEY:In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 0854538 iyo Jeeg War. Lam. 0854540 laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0854538 iyo J.W.Lr. 0854540 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Maxamuud Cusmaan Cawad.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuud Cusmaan Cawad lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 422

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Faarax Ibraahim;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 28375 laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lamb. 28375 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 697.981.90 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Faarax Ibraahim lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 697.981.90 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 423

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Rashiid Sheekh;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 1922712 iyo Jeeg War. Lr. 1922726 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1922712 iyo Jeeg War. Lr. 1922726 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca, Maxamed Xaashi Axmed iyo Xafso Xaaji Maxamed

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Rashiid Sheekh lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Maadeey)

L. 424

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Xasan Xeeyd;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 1961349 iyo Jeeg War. Lr. 1113097 lagana kala sameeyey Laamaha 2aad iyo Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 1961349 iyo Jeeg War. Lr. 1113097 lagana kala sameeyey Laamaha 2aad iyo Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna kala jirto 100lacag dhan Sh.So. 100.000 iyo Sh.So. 50.000 kuna kala qoran magacyada Nuux Axmed Xasan iyo Aamino Sh. Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha 2aad iyo Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Maxamuud Xasan Xeeyd lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 150.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Maadeey)

L. 425

MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL LAASCAANOOD
L.MGS/75/81 Tr. 19.10.1989

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL

HADDUU ARKAY: In Jeegagga Wareega L. 1694874, ee 16.8.89, Sh.So. 100.00000 iyo Jeegga L. 1064081 ee 25.9.89 Sh. So. 50.000.00, kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood;

HADDUU ARKAY: Taarka Baafinta Lambar La'aanta Taariikh 18.10.1989, Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood iyo Arjiga Dhibbanaha sare ku qoran;

MARKUU ARKAY: Qod. 69, Sharciga L. 2 ee 9.9.1965;

WUXUU XEERINAYAA

In la baabi'iyo Jeegaggaas sare ku xusan L. 1694875 ee 1 .8.89, L. 1064081 ee 25.9.89 kuna jiraan Sh.So. 150.000.00 kuna qoran Jaamac Faarax Cali.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed u beddelo Jaamac Faarax Cali Jeegaggaas kor ku qoran uguna beddelaan kuwo la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo dhan 30 casho maalinta go'aankan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, haddaan inta ka horreysa la helin wax is-hortaag ah.

Laascaanood, 19.10.1989

GUDDOOMIYAHA MGS
(Yuusuf Xasan Cabdi)

L. 426

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Maxamuud Geedi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 1134726—1134727 laga sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 1134726—1134727 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 25.000 kuna qoran magaca Axmed Maxamuud Geedi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Axmed Maxamuud Geedi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 75.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 427

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cabdi C/-qaadir Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lambaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1622188	100.00	Cabdi C/qaadir Faarax	Balcad
0115431	50.00	» » »	»
0115432	50.00	» » »	»
027252	20.00	» » »	»
027253	20.00	» » »	»
027254	20.00	» » »	»
027255	20.00	» » »	»
027256	20.00	» » »	»

laga sameeyey Laanta Balcad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XAERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Laanta Balcad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Cabdi C/qaadir Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Balcad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdi C/qaadir Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 419

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdul-laahi Axmed Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lamabaroodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1101512	100.000	Faarax Cabdullaahi Aadan	Burco
1102171	100.000	» » »	»
0670161	50.000	» » »	»
1052414	100.000	Maxamed Kediye Mire	»
1102375	100.000	Cabdi Xaashi Maxamed	»
1102377	100.000	Cali Ibraahim Boolis	»
1101600	100.000	Maxamed Cartan Cali	»
1102344	100.000	Deeqa Xersi Samatar	»
0640196	50.000	Cumar Ismaaciil Xuseen	»
0681005	50.000	Cali Cubeed Ayaanle	»
0004984	100.000	Bashiir Cabdi Cali	Berbera
0635119	50.000	Canab Maxamed	»
1135695	100.000	Cabdi Cismaan Faarax	Gaalkacyo

lagana sameeyey Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran laga sameeyey Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.100.000 kuna qoran magaca midwalba ku hor qoran.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Cabdullaahi Axmed Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.100.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 430

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Suur Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lmabaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0524326	500.000	Hire Cabdi Cismaan	5/Xamar
0524327	500.000	» » »	»
0524328	500.000	» » »	»

laga sameeyey Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.500.000 kuna qoran magaca Hire Cabdi Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulqaadir Nuur Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horerysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 431

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cismaan Canshuur Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0996233 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0996233 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Maxamuud Cabdisalaam Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cismaan Canshuur Cabdulle lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.10.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 432

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Sahra Maxamed Sheekh;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0218614 laga sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0218614 lagana sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca Sahra Maxamed Sheekh.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Sahro Maxamed Sheekh lacagta cadeedu tahay Sh.So. 20.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 25.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 436

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Warsame Barre Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0484930 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0484930 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Cumar Maxamuud Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Warsame Barre Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.10.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 435

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi raxmaan Axmed Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 1729087 laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1729087 lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Aadan Jaamac Cumar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdiraxmaan Axmed Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto mmuddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 434

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Cabdi Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 1888677 laga sameeyey Laanta 4aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.Sis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1888677 lagana sameeyey Laanta 4aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100.000 kuna qoran magaca Axmed Cabdi Saalax;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Faadumo Cabdi Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Muudeey)

L. 433

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxa-Aadan Ciise;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 1521343 lagana sameeyey Laanta Kaalkacyo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Nuur Cali sida ku cad warqadda lam. 7419 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1521343 lagana sameeyey Laanta Kaalkacyo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100.000 kuna qoran magaca Cabdi Nuur Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Kaalkacyo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Aadan Ciise lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 438

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Aadan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 1105811 laga sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1105811 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 35.000 kuna qoran magaca Shacni Xuseen Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Aadan Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 35.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 439

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Jaamac Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0092744 ayna ku jirto lacagta cadadeedu dhan yahay Sh.So. 300.000 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed Laanta Burco, sida ku cad warqadda lam. 9443 oo ka soo baxday Xisaabaha Dhexe;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0092744 kuna qoran magaca J.le Jaamac Nuur Maxamuud kuna jirto lacagta dhan 300.000 Sh.So. lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Jaamac Nuur lacagta cadadeedu dhan tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 440

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cumar Axmed Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay (Treval Sheque) Lam. 102—4200—715—347.361 lagana sameeyey Q.S.L. Qalaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan USD. 300. Den. 20, kuna qoran magaca Cumar Axmed Cabdulle sida ku cad warqadda lam. 72684;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) (Treval Sheque) lam. 102—4200—715—347.361, lagana sameeyey Q.S.L. Qalaad kuna jirto lacag dhan USD. 300. Den. 20 kuna qoran magaca Cumar Axmed Cabdulle.

WUXUU AMRAYAA

Laanta Q.S.L.Qalaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cumar Axmed Cabdulle lacagta dhan USD. 300. Den. 20 oo ah bedelkii (Treval Sheque) markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 441

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Xasan Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 1967478 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100.000 kuna qoran magaca J.le Sureer Yuusuf Jaamac sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1967478 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Sureer Yuusuf Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuud Xasan Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdish,o 4.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 442

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Faadumo Saalim Cawad;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 2351 laga sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lam. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 4351 laga sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 156.500.000 kuna qoran magaca Faadumo Saalim Cawad.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Faadumo Saalim Cawad lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 156.500.000 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 443

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAH: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Drs. Faadumo Cali Saciid;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeeagagga War. ee Lambaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1978194	100.000	Drs. Faadumo Cali Saciid	Xarunta
1978195	100.000	» » » »	»
1138379	50.000	» » » »	»

lagana sameeyey Laatna Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. 250.000 kuna qoran magaca Drs. Faadumo Cali Saciid sida ku cad warqadda lam. 5328 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 oo 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 250.000 kuna qoran magaca Jaalle Drs. Faadumo Cali Saciid.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Drs. Faadumo Cali Saciid lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 250.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Bashiir Maadeey Sheekh)

L. 444

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Caasha Ceeljoog Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lamabaradoodu kala yihiin sidatan:—

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0092856	380.000	Caasha Ceeljoog Nuur	Burco
0092857	500.000	» » »	»
0092858	500.000	» » »	»
1051916	100.000	Maxamuud Maxamed Cabdi	»

laga sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga lam. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeeyy Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.480.000 kuna kala qoran magacyada Caasha Ceeljoog Nuur iyo Maxamuud Maxamed Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Caasha Ceeljoog Nuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.480.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto buddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 445

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Asad Shariif Mudhir;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0375999 lagana sameeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0375999 lagana sameeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca C/raxiin Maxamuud Cusmaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Asad Shariif Mudhir lacagta cadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, hadd iiinta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Sh. Maadeey)

L. 446

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cali Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu umay Jeeg War. Lamb. 1944435 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Cali Axmed, sida ku cad warqadda lma. 3338 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L.2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la biibi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1944435 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Cali Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Cali Axmed lacagta cadadkee du yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.11.1989

(Dr. Bashiir Sh. Maadeey)

L. 447

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Maxamed Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lamabaradoodu kala yihiin sidatan: —

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1392614	100.000	Keyse Maxamuud Indhotaag	L/caanood
1392620	100 000	» » »	»
1391376	100 000	Axmed Maxamuud Xasan	»
1493642	100.000	Caydiid Dirir Xasan	2/Xamar
1493643	100.000	» » »	»
1493644	100.000	Maxamuud Axmed Shire	»
1274340	100.000	Cabdullaahi Maxamed Cali	Jowhar
1309356	100.000	Maxamed Mahad Cali	Gaalkacyo

laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Laamaha kor ku sheegan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 800.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku sheegan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J le Cabdullaahi Maxamed Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 800.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 15.11.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

L. 448

SHIRKADDA KAAH PHOTOGRAPHIC SUPPLIES, LIMITED

OGEYSIIS FADHI SHIR CAADI AH

Dhammaan saamileyda Shirkadda KAAH PHOTOGRAPHIC SUPPLIES, LIMITED waxa la ogeysiinayaa in maalinta 11ka bisha Jannaanayo ee sannadka 1990, saacaddu markay tahay 7da Fiidnimo, Xarunta Shirkadda oo ku taal MUQDISHO, Degmada Xamar Weyne, lagu qaban doono fadhigii shir sannadeedkii caadiga ahaa ee Shirkadda kor ku xusan. Arrimaha shirkaas looga hadli doono wee kuwa soo socda:

1. Xaaladda xisaab xirka 1989.
2. Miisaaniyadda cusub ee 1990.
3. Arrin kastoo kale oo fadhiga la hor keeno.

Fadhiga shirka waxa ka soo qeyb geli kara Saamileyda magacyadooda lagu qoray Diiwaanka Saamileyda, ugu yaraan shan (5) maalmood ka hor maalinta shirka loo cayimay in uu fadhiisto, iyo kuwa isla muddadaas dhexdeeda Saamiyaalkooda soo dhigay Saldhigga Shirkadda ama Bankiga Gaĥacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed — Laanta Xarunta — Muqdisho.

Waxa dhammaan Saamileyda laga codsanayaa in ay yimaadaan fadhiga shirkaas, ayna dhowraan saacadda fadhiga loo cayimay in la qabto.

Muqdisho, 30.11.1989

MAAMULAHA KELI AH
(Cali Maxamed Maxamuud)

L. 449

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Hiloowle Mahadalla;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0528520 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Cali Cabdi Shakuul sida ku cad warqadda lam. ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 0528520 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Cali Cabdi Shakuul.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xasan Hiloowle Mahadalla lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500,000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Sh. Maadeey)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Saynab Cabdi Ismaaciil;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0562500 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 172.948 kuna qoran magaca J.le Saynab Cabdi Ismaaciil sida ku cad warqadda lam. 13930 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0562500 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Shs. 172.948 kuna qoran magaca J.le Saynab Cabdi Ismaaciil.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Saynab Cabdi Ismaaciil lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 172.948 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Sh. Bashiir Maadeey)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARAK: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Cali Cabdi Dhogor;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0575872 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Maxamuud Cali Xuseen sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 0575872 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Shs. 500.000 kuna qoran magaca J.le Maxamuud Cali Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xaaji Cali Cabdi Dhogor lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.12.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Sh. Bashiir Maadeey)

IIB MA GALO

FAAFIN RASMIAH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 5 Dis. 1989 L 1 R 12

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOBNIIN

QEYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI Lr. 37, ee 23 Nofembar 1989
Sharciga Hay'adaha maaliyadeed ee Soomaaliya ..... Bog. 784

LAW No.37 of 23 November 1989
Financial Institutions Law 811

QEYBTA LABAAD
XEER - W. M.

Sharci lambar 37, taariikh 23 Nof. 1989

Sharciga Hay'adaha maaliyadeed ee Soomaaliya

MADAXWEYNAHA

ISAGOO TIXGELINAYO oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA KOOWAAD
GOGOL-DHIG

Qod. 1aad
Dhaqangelid

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Hay'adaha Maaliyadeed ee 1989", wuxuuna dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 2aad
Qeexid

1. Ereyada soo socda ee sharcigan waxaa loola jeedaa sidatan, haddii aan si kale loo fasirin:

b) "Hawlaha Bankiga" (Banking Business) waxaa loola jeedaa:

i) hawlaha ka dhasha lacago la qabto oo laga qabto dadweynaha ama xubno ka mid ah, taasoo ka timid qabashada lacago dhitooyin ah laguna bixiyo weydiisasho ama waqti xaddidan ka dib, ama ogeysiin ka dib, ama hawl kasta oo nocaas ah oo ka abuuranta gadid joogto ah ama meeleyn qoraallada deynta damaanadda ah (bonds), shahaadooyin ama warqado kale oo leh damaanooyin maaliyadeed;

ii) hawlaha lagu sameeyo amaahda ama maalgelinta e dheefteeda iyo khatarteedaba (risks) uu leeyahay qofka sameeya hawshaas;

iii) wixii kale ee hawl ah oo loo aqoonsado in ay ka mid tahay hawlaha caadiga ah ee Banki ee hay'ad maliyadeed ku qabato hawlaha ku xusan lambarrada 1 iyo 2 ama uu dheeri ahaan u siiyo awood Bankiga Dhexe;

t) "Banki" waxaa loola jeedaa hay'ad kasta ee maaliyadeed oo qabata isla markaas hawlaha lagu tilmaamay b (i) iyo b (ii) oo ay

ku jirto qabashada dhitooyinka, kuwaas oo lagu wareejin karo jeeg ahaan ama amar lacag bixin ah oo ka yimid cid saddexaad (third party);

j) "Bankiga Dhexe" waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

x) "Hay'ad amaaheed" waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo maaliyadeed oo qabata hawlaha lagu tilmamay b (i) iyo b (ii) oo aysan ku jirin qabashada dhitooyinka, kuwaas oo lagu wareejin karo jeeg ahaan ama amar lacag bixin ah oo ka yimada cid saddexaad;

kh) "Hay'ad maaliyadeed oo gaar ah" waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo maaliyadeed oo qabata hawlaha lagu tilmaamay b (i) iyo b (ii) keliya;

d) "Hay'ad maaliyadeed" waxaa loola jeedaa qof kasta oo qabta hawlo bankiyeed oo ay sharci tahay in ay ku dhisnaadaan Sharcigan, haddii aan si kale loo fasirin, dhammaan xafiisyada iyo laamaha ay hay'ad maaliyadeed ku leedahay Soomaaliya gudaheeda, loona aqoonsanayo hal hay'ad maaliyadeed;

r) "Hay'ad maaliyadeed ee dibadeed" waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo ka dhisan dibedda, hawlana ka qabata Soomaaliya, ha ahaadeen hawlahaasi kuwo banki ama kuwo kale;

s) "Soomaaliya" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;

sh) "Hay'ad maaliyadeed ee shatiyeysan" waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo shati lagu siiyey si waafaqsan shuruudaha sharcigan;

dh) "Hay'ad maaliyadeed oo ka dhisan dalka gudihiisa" waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo ku dhisan sharciga Soomaaliya;

c) **"Xubin ka tirsn Guddiga Maamulka" (member of the Board of** directors), waxaa loola jeedaa:

i) haddii ay la xiriirto hay'ad maaliyadeed ee gudaha dalka, qof kasta, ha lahaado magac kasta, ee fulinaya ama awood loo siiyey inuu fuliyo isla hawlaha asaasi ahaan la xiriira maamulka hay'adda maaliyadeed isla kuwa uu fuliyo xubin ka mid ah Guddiga maamulka ee shirkad, kuna dhisan sharciga Soomaaliya;

ii) haddii ay la xiriirto hay'ad maaliyadeed ee dibadeed, waa labada xubnood ee ka tirsan Guddiga maamulka ee kala ah sida kor ku qeexan iyo qofka mas'uulka uga ah hay'ad maaliyadeed ee dibadeed Soomaaliya gudaheeda xagga fulinta hawsheeda;

g) "Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka mas'uulka ka ah arimaha maaliyadda;

f) "shakhsi" waxaa soo gelaya shirkad kasta, shuraako, urur ama hay'ad sharikadeed ha diiwaangahnato (incorporate) ama yuusan diiwaan gashanaan (un incorporate);

q) "goobta hawsha" waxaa loola jeedaa laan kasta ama xafiis kasta ee ay hay'ad maaliyadeed ku leedahay Soomaaliya gudaheed oo ay ku jirto xafiis guuraya oo u furan dadweynaha;

k) "aan daammaanad lahayn", haddii ay la xiriirto horumarisyada (advances) ama tas-hiilaadka amaahyada (credit facilities) waxaa loola jeedaa horumarisyada ama tas-hiilaadka amaahyada lagu bixiyey dammanad la'aan, ama lagu bixiyey dammaanad, laakiin qayb ka mid ah ay ka badan tahay waqti kasta ha ahaatee, qiimaha ay suuqa ka joogto hantida (assets) ay ka badan tahay dammaanadda la bixiyey, ama ay ka badan tahay qiimaha Bankiga Dhexe uu oggolaaday, mar kasta oo uu u arko in hantidaan aanay lahayn qiime suuqeed oo la caddeyn karo.

QAYBTA LABAAD
SHATIYADA

Qod. 3aad

Shatiyeyn hay'ad maaliyadeed

1. Hay'ad maaliyadeed ee gudaha kama hawl geli karto Soomaaliya ama dibeddeeda, sidoo kale hay'ad maaliyeed ee dibadeed kama hawl geli karto Soomaaliya gudaheeda, haddii aysan ka helin shati Bankiga Dhexe oo awood u siinaya shatiilaha inuu qabto hawshaas. Shatigu wuxuu tilmaamayaa darajada (class) ay tahay hay'adda maaliyadeed iyo hawlaha uu awoodda u leeyahay shatiiluhu inuu qabto.

2. b) Shakhsi kasta oo intuusn dhaqangelin Sharcigan ka qabanaya hawl banki Soomaaliya, kuna talo jiro inuu sii wado hawshaas, waa inuu muddo sagaashan maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta la soo saaro sharcigan, uu u soo gudbiyaa Bankiga Dhexe codsi shati ku meel gaar ah, soona raaciyaa wixii xog ah ee loo baahan yahay ee ku xusan qodobka 4aad ee sharcigan.

t) Bankiga Dhexe wuxuu siinaya shatiyo ku meel gar ah oo 12 bilood ah cid kasta oo ka haysay Soomaaliya hawl bankiyeed marka uu soo baxo sharcigan.

j) Inta aysan dhicin muddada lagu tilmaamay xarafka (t), hay'ad maaliyadeed kasta oo haysata shatiga ku meel gaarka ah, dooneysana in ay Soomaaliya ka sii waddo hawl bankiyeed, waxay soo codsaneysaa shati sida uu qabo qodobka 4aad, waxaana la siinayaa shati kama danbeys ah, haddii ay soo buuxiso shuruudaha sharcigan.

x) Haddii uusan sharcigu si kale u caddeyn ama shatiga ku meel gaarka ah, hay'ad maaliyadeed kasta ee heysata shatiga ku meel gaarka ah waxaa lagu dhaqayaa shuruudaha sharcigan.

3. Qof kasta oo doonaya inuu qabto hawl bankiyeed ka dib marka uu dhaqan galo sharcigan, inta uusan bilaabin hawshaas waa inuu soo codsadaa shati sida ay qabaan shuruudaha qodobka 4ad ee sharcigan.

Qod. 4aad
Codsiga shatiyada

1. Qofku, si uu u helo shati hay'ad maaliyadeed, waa in uu u soo gudbiyaa Bankiga Dhexe codsi qoraal ah isagoo soo raacinaya waxyaabaha soo socda:

b) nuqullo sugan (authentical copies) oo muujinaya qaab dhismeedkeeda;

t) cinwaanka Xafiiska Xarunta, cinwaanka iyo magacyada Xubin kasta ee Guddiga (board) iyo Sarkaalka madaxda ka ah;

j) wixii macluumaad ah ee maaliyadeed oo uu weydiisto Bankiga Dhexe;

x) hawsha uu doonayo inuu qabto oo tifaftiran;

kh) goobaha xarunta iyo meelaha kale ee uu doonayo in uu ka fuliyo hawshaas ee Soomaaliya gudaheeda; haddii uu yahay Xafiisku mid guurayana, goobaha loogu talo galay in uu u adeego;

d) wixii kale ee xog ah ee uu u baahdo Bankiga Dhexe;

r) khidmadda codsiga oo macquul ah ee uu soo cayimo Bankiga Dhexe, isaga oo oggolaansho ka haysta Wasiirka.

2. Codsiga iyo dokumentiga kale ee la soo gudbiyo oo waafaqsan xubin hoosaadka (sub section) (1) waxaa saxiixaya Xubnaha Guddiga (board of directors), codsadaha iyo qof kasta oo madax ah oo sharci ahaan awood loo siiyey inuu saxiixo.

3. b) Bankiga Dhexe markuu tixgelinaayo codsi shati wuxuu sameynayaa baaritaanno loo baahan yahay si loo xaqiijiyo dhab ahaantii (validity) dokumentiga lagu soo gudbiyey xubin hoosaadka (1), wuxuu u kuur gelayaa taariikhda iyo heerka (status) maaliyadeed ee codsadaha, dabeecadda iyo waayo aragnimada maamulkiisa, ku filnaashaha raasumalkiisa, habboonaanta iyo baahida bulshada uu doonayo in uu u adeego, hawlaha uu doonayo in uu fuliyo iyo faa'iidooyinka laga filaayo goobaha loo adeegayo. Bankiga Dhexe si uu u xaqiijiyo dabeecadda codsadaha iyo maamulkiisa wuxuu adeegsanayaa shuruudaha qodkabka 27 (1) iyo (2).

t) Hay'ad maaliyadeed ee hoos timadda xubinta la siin maayo shati, ilaa ay ka fuliso waxyaabaha laga doonayo oo ku cad Qod. 14 (1), (b), (i), haddii ay banki tahay ama Qod. 14 (1), (t), (i), haddii ay tahay hay'ad amaaheed ama hay'ad maaliyadeed oo khaas ah.

4. Sagaashan (90) maalmood ka dib marka codsiga la qabto, ama haddii loo baahday xog (information) kale oo dheeraad ah, markii xogtaa la helo, Bankiga Dhexe wuxuu bixinayaa shati ama wuxuu ku wargelinayaa codsadaha in loo diiday shati iyo sababaha ay ku saleysan tahay diidmadaas. Haddii uu Wasiirku uu u soo gudbiyo Bankiga Dhexe caddeyn tilmameysa in aysan dan u ahayn Soomaaliya bixinta shatigaas, sabab kale looma baahna in loo gudbiyo codsadaha, iyadaana ku filan diidmada.

5. Bankiga Dhexe marka uu bixiyo shati wuxuu ku xiri karaa shatiilaha shuruudo, kuwaasoo waafaqsan arrimaha lagu soo bandhigay xubin hoosaadka (3) (b). Haddii ay tahay hay'addu mdi dibadeed, iyadoo aan waxba loo dhimeyn xaaladda guud ee hadda la xusay, Bankiga Dhexe wuxuu shardi uga dhigayaa billaabidda hawsha in la soo gudbiyo dokumentiga soo socda:

b) qoraal sharciyeysan oo uu ku magacaabayo Bankiga Dhexe in uu yahay Wakiilkiisa dhabta ah oo sharci, kaasoo kiis kasta oo lid ku ah oo ka dhasha fulinta hawlihiisa meel kasta oo Soomaaliya ka mid ah loogu adeegi doono si buixda sida hayqad maaliyadeed oo Soomaaliya laga dhisay oo kale;

t) caddeyn magacaabid oo qoraal ah oo la beddeli karo ka goor ka goor iyadoo la sameynayo mid cusub, tilmaameysana magaca iyo cinwaanka sarkaalka, wakiilka ama shakhsi kale oo ku sugan Soomaaliya, kaasoo:

i) Bankiga Dhexe uu u gudbinayo kiis kasta hawl ah (process); ama

ii) dawcad kasta oo uusan lahayn adeeggeeda Bankiga Dhexe sida ku cad xarafka (b).

Qod. 5aad

Isticmaalka iyo eryega "Bankiga"

1. Shakhsi kasta oo aan ahayn hay'ad maaliyaded oo shati leh ma shaqeyn karo banki ahaan, haddii uusn oggolaansho ka haysan Bankiga Dhexe, mana isticmaali karo eregya "Banki" ama mid ka dhasha ereyga BANKI luqad kasta ha ahaatee ama erey kale oo muujinaya wax is dhaafsi (tranasaction) hawl bankiyeed, magac ahaan ama timaan ahaan uu qofkaas ka fulinaayo hawshaas Soomaaliya gudaheeda, ama uu sameeyo ama sii wado in uu matalo hawl bankiyeed oo ka muuqata qaansheegyada uu leeyahay, warqadaha, ogeysiisyada iyo iidhehyada ama arrimo kale oo la xiriira si uu Soomaaliya uga fushado ujeeddada hawshaas; ha yeeshee haddii ay jirto hay'ad maaliyadeed oo qabaneysay hawl bankiyeed, muddo hal sano ka horreysay taariikhda Sharcigan soo baxo, isticmaaleysayna ereyga banki, waxaa dooran kartaa in ay haysato isticmaalka ereygaas iyo ereyada kale ee ka dhasha.

2. Tilmaanta xubin-hoosaadka (sub-section) (1) ma hor istaageyso qofkii isticmala ereyga BANKI ama ereyada kale ee ka dhasha, haddii u doonayo in uu u adeegsado sidii uu u dhisi lahaa shirkad, ujeeddadeeduna ay tahay inuu ku helo shati sida uu qabo sharcigan.

Qod. 6aad

Magaca Hay'ad Maaliyedeed

1. Hay'ad maaliyadeed oo la siinayo ama loo daynayo shati ma jirto, haddii magaceedu uu ad ugu dhaw yahay ama shaabahdo magac hay'ad hore u dhisneyd, taasoo uu Bankiga Dhexe u arko in ay marin habaabin karto dadweynaha.

2. Hay'ad maaliyadeed oo kasta haddii aysan ka helin oggolaansho qoraal ah, ma isticmaali karto ama isuguma yeeri karto magac aan ahayn kii shatiga lagu siiyey.

3. Shati kasta oo sharcigan lagu bixiyey waa in la soo bandhigaa laguna hayaa Xafiiska Xarunta, Xafiisyada kale, laamaha iyo meel kasta oo ay hay'ad maaliyadeed hawl ka fuliso, lana dhigo meel ay dadweynuhu aad uga arki karaan.

Qod. 7aad
Goobta shaqada

1. Shati kasta oo la bixiyo wuxuu u oggolaanayaa hay'adda maaliyadeed ee shatiga la siiyey in ay hawlo ka fuliso meesha ama meelaha lagu tilaamay shatiga.

2. Hay'ad maaliyadeed marka ay hesho shatiga, iyo lix bilood ka dib marka ay bilowdo hawlaha Bankiga ama waqti ka horreeya, iyada oo ka haysato oggolaansho Bankiga Dhexe, waxay furi kartaa goob shaqo oo cusub hadba meelaha ay ka doorato, iyada oo ogeysiineysa Bankiga Dhexe waxa ay damacsan tahay. Hay'ad maaliyaded ma beddeli karto mana xiri karto goob shaqo ee Soomaaliya gudaheeda ah, haddii aanay wafqsaneyn xeerka uu dejin doono Bankiga Dhexe.

Qod. 8aad
Sarrifayaasha lacagaha qalaad

Bankiga Dhexe wuxuu shati siinayaa sarrifayaasha lacagaha qalaad oo oggolaada shuruudaha xog warranka ee Bankiga Dhexe uu goor ka goor xeer ahaan iyo nidaam ahaan u dejin doono, ka dib marka sharcigan soo baxo.

Qod. 9aad
Lahaanshaha hay'adaha maaliyadeed

1. Gebi ahaan Saamiyada codka leh (voting stock) ee ay soo saarto hay'ad maaliyadeed ee gudaha ah, wuxuu yeelanayaa qaab diiwaangashan.

2. Haddii uusan oggolaan Bankiga Dhexe, qofna ma yeelan karo si toos ah ama si dadban saamiga codka leh (voting stock) ee hay'ad maaliyadeed oo gudaha ah oo siineysa in ka badan boqolkiiba labaatan wadarta awoodda codka.

3. Haddii uusan oggolaansho siin Bankiga Dhexe, hay'ad maaliyadeed ee gudaha uma bannaana:

   b) in ay shirkad kale ka mid noqoto ama ku darsanto;

   t) in ay wareejiso gebi ahaan ama qaar kasta oo asaasi ah oo ka mid ah hantideeda ama qaanteeda (liabilities) ee Soomaaliya gudaheeda;

j) in ay hoos u dhigto rasumaalka la bixiyey (paid-up capital);
x) in ay beddesho magaceeda ku yaal shatiga;
kh) in ay wax ka beddesho qoraalka ay ku dhisan tahay;
d) in ay fuliso hawlo bankiyeed oo ka baxsan kuwa shatiga loo siiyay.

4. Haddii uusan oggolaansho siin Bankiga Dhexe, Hay'ad maaliyadeed ee dibadeed ee sharcigan shati lagu siiyay uma bannaana:
   b) in ay wareejiso hantideeda ama in badan oo ka mid ah hantideeda ama qaanteeda (liabilities) ee Soomaaliya gudaheeda;
   t) in ay hoos u dhigto rasumaalkeeda loo qoondeeyey Soomaaliya;
   j) in ay magaceeda ka beddesho kan shatiga;
   x) in ay fuliso hawlo bankiyeed oo ka baxsan kuwa shatiga loo siiyey.

5. Bankiga Dhexe marka uu tixgelinayo falalka lagu sheegay xubin-hoosaadka (3) iyo (4) ee qodobkan, wuxuu ka shidaal qaadanayaa shuruudaha ku xusan qodobka 4 (3).

Qod. 10aad

Ka qaadid shati

1. Bankiga Dhexe waa ka qaadi karaa shatiga, shatiilaha:
   b haddii uusan muddo 12 bilood ah gudahood ku billaabin hawlihiisa kaddib marka la siiyo shatiga ama uusan muddo kordhin qoraal ah ka helin Bankiga Dhexe, ama:
   t) haddii uu raaci waayo shuruudaha shatiga ama tallaabooyinka uu doonayo Bankiga Dhexe oo waafaqsan qodobka 23aad, ama:
   j) haddii uu jebiyo qodob ka mid ah qodobbada sharcigan ee lagu dhaqi lahaa, ama:
   x) haddii ay tahay hay'ad maaliyadeed, mid joojisay hawlaha bankiyeed Soomaaliya gudaheeda.

2. Bankiga Dhexe inta uusan ka qaadin shatiga hay'ad maaliyadeed ama sarifka lacag qalaad, hadba xaaladdu sida ay tahay, wuxuu u soo gudbinayaa digniin in shatiga laga qaadi doono, wuxuuna fursad u siinayaa shatiilaha in uu keeno sababo aan shatiga looga qaadin.

3. Markii shatiga laga qaado hay'ad ama shakhsi, Bankiga Dhexe sida ugu dhaqsaha badan oo suurtagal ah, kaddib marka ay dhammaato muddada ku xusan 11aad, haddaan wax rafcaan ah

(Apeal) laga gudbin, ama marka ay Maxkamaddu go'aan gaarto rafcaanka kaddib, wuxuu ku soo saarayaa ogeysiinta ka qaadid shatiga Faafinta Rasmiga ah iyo wargeys si baahsan loo akhristo goobta uu ku yaal xafiiska xarunta shatiilaha ee Soomaaliya gudaheeda, wuxuu kaloo qaadayaa tallaabooyinka loo baahan yahay si loo wargeliyo dadweynaha.

Qof. 11aad

U Rafcaan Qaadasho Maxkamad

Soddon casho gudahooda laga bilaabo maalinta la helo digniinta Bankiga Dhexe ee ah diidmo shati ee ku xusan qodobka 3 ama 4 ama 8 ama go'aankiisa ah ka qaadid shati ee ku xusan qodobka 10aad ama diidmadiisa ah in uu oggolaado soo jeedinnada (Proposals) ku xusan Qodobka 9aad (2), (3) ama (4), hay'ad maaliyadeed ama codsade kasta waxaa u furan in uu rafcaan u qaato Maxkamadda u awoodda leh.

Qod. 12aad

Hawl bankiyeed ee aan shati lahayn

1. Bankiga Dhexe haddii uu helo sabab uu ku rumeysto in qof aan shati lahayn uu qabanayo hawl bankiyeed ama sarrif lacag qalaad, qofkaas waa loo yeerayaa waxaana la baarayaa buugaagtiisa iyo diiwaannadiisa xisaabeed si loo xaqiijiyo arrimahaas. Qof kasta oo isagoon shati lahayn:-

   qabta hawl bankiyeed ama sarrif lacag qalaad; ama:

   ii) diida in uu soo bandhigo buugaagtiisa, xisaabaadkiisa iyo qoraalladiisa, si loo baaro kaddib marka uu ka codsaday Bankiga Dhexe, waa dembiile, waxaana la saarayaa maxkamadda, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badnayn laba milyan shilin Soomaali (Shso. 2.000.000).

2. Qofkii haysta lacag uu ka helay qabasho hawl bankiyeed isaga oo aan lahayn shati, dib ayuu u bixinayaa lacagahaas isagoo u hoggaansamaya waxyaabaha uu faray Bankiga Dhexe.

QAYBTA SADDEXAAD
SHURUUDAHA MAALIYADEED IYO XADDIDAADYADA

Qod. 13aad

Rasumaalka iyo Keydadka "Reserves"

1. b) Hay'ad kasta oo maaliyadeed waa in ay yeelataa rasumaal aan kala dhantaalneyn oo la bixiyey, haddii shirkaddu tahay hay'ad maaliyadeed oo gudaha ah ama loo qoondeeyey,

haddii shirkaddu tahay mid maaliyadeed ee dibadeed, raasumaalku waa in uu la mid noqdaa ugu yaraan tirada lacageed ee lagu xusan Qodobka 14aad (1) (B) (i) ama Qodobka 14aad (1) (t) (i), hadba xaaladdu sida tahay.

t) Si loo xisaabio raasumaalka ugu yar ee laga doonayo hay'ad maaliyadeed, markii tirada lacagta la sheegay loo tixgelinayo qaanta Bankiga, raasumaalka iyo qaantuba waxay noqonayaan kuwa uu Bankiga Dhexe xeer iyo nidaam ku qeexi doono.

2. b) Hay'ad kasta oo maaliyadeed waa in ay leedahay xisaab keyd ah oo inta ayan ku dhawaaqin qaybta saamileyda ama ayan faa'iidadeeda u wareejin xarunteeda ama meel kale, waa in ay xisaabtaas ku shubtaan qaar ka mid ah faa'iidadeeda saafiga ah sannad walba kaddib marka ay ka saarto lacagaha loogu tala galay canshuuraha. Lacagaha loo wareejinayo xisaabta keydka ah waa in ayan ka yaraan kuwa lagu xusay Qodobka 14aad (1) (b) (ii) ama Qodobka 14aad (1) (t) (ii), hadba sida xaaladdu tahay.

t) Bankiga Dhexe ka goor ka goor wuxuu xeer ahaan ku tilmaamayaa habka "method" loo xisaabinayo tirada lacagta iyo qaabka xisaabta keydka.

j) Xisaabta keydka lama yareyn karo lamana nusqaamin karo, haddii uusan Bankiga Dhexe oggolaan hoos u dhigidda markii xisaabta laga wareejinayo lacag lagu kordhinayo raasumaalka iyo markuu Bankiga Dhexe oggolaado in la dhimo xisaabta keydka, taasoo ah sida keliya oo looga baxsan karo is-dhinka raasumaalka, taasoo ku xiran hadba heshiiska lala galo Bankiga Dhexe muddada lagu saxayo nusqaantaas.

Qod. 14aad

Shuruudaha raasumaalka loo baahan yahay

1. Shuruudaha soo socda waxaa lagu dhaqi doonaa hay'adaha maaliyadeed:

b) kuwa u shaqeeya banki ahaan:

i) raasumaalka ugu yar ee loo baahan yahay waa inuusan ka yaraan hadba kii badan (1.000) malyan shilin soomaali ama (boqolkiiba shan) qaantiisa guud ee Soomaaliya, marka laga fiiriyo xaaladdiisa dheellitirka xisaabaadka. Qiimaha sugan ee ugu yar oo laga doon-

ayo raasumaalka waa in lagu saxaa sannad kasta iyadoo ku saleysan xeerarka Bankiga Dhexe iyadoo loo eegaayo tusaha sicirka Muqdisho, sida ay ju soo saareen Wasaaradda Qorshaha. Bankiga Dhexe waa in uu ku soo qoraa xeerarkaas Faafinta Rasmiga ah;

ii) waa in lagu wareejiyaa sannad xisaabeed kasta aakhirkiisa keydka xisaabeed lacag la mid ah:

B) in aan ka yareyn boqolkiiba shan iyo labaatan (25%) faa'iidada saafiga ah ilaa haraaga keydka xisaabta uu la mid noqdo barkiis lacagta ugu yar ee looga baahan yahay raasumaalka, ama:

T) faa'iidadaas saafiga ah in aan ka yareyn boqolkiiba shan iyo toban (15%) mar kasta oo haraaga xisaabta keydka la mid tahay ama ay ka badan tahay bar, laakiinse ay ka yar tahay guud ahaan tirada laga doonayo raasumaalka.

t) kuwa u shaqeeya sida hay'ad amaaheed ama hay'ad maaliyadeed oo khaas ah:

i) raasumaalka ugu yar ee laga doonayo waa in uusan ka yaraan tirada Bankiga Dhexe uu ku qeexay xeerarkiisa iyadoo loo eegayo nooca hay'adda ku habboon;

ii) waa in sannad kasta loo wareejiyaa xisaabta keydka lacag la mid ah in aan ka yareyn boqolkiiba labaatan iyo shan (25%), faa'iidada saafiga ah, ilaa haraaga keydkaas xisaabeed uu la mid noqdo guud ahaan tirada ugu yar ee looga baahan yahay raasumaalka.

2. Markii uu raasumaalka ugu yar ee hay'ad maaliyadeed laga doonayo, sida laga xisaabay isu geynta qaanteeda, uu ka bato tirada lacageed ee raasumaalka, waxay hay'ad maaliyadeed awoodi kartaa, ku meel gaar ahaan, ayadoo xilligaas raaceysa awaamiirta Bankiga Dhexe uu u qeexay in ay ku darto markay xisaabayso raasumaalkeeda, haraa kasta oo ka badan tirooyinka ugu yar ee loo soo wareejiyey xisaabtaas, ayadoo la raacayo shuruudaha xubin-hoosaadka (1), (2), hadba sida xaaladdu tahay.

3. Bankiga Dhexe wuxuu xeer ahaan u qeexayaa isu dhigga (ratio) ugu yar ee hay'ad maaliyadeed tahay in ay yeelato oo u dhexeeya raasumaalkeeda iyo keydkeeda dhinac, iyo wadarta lacagaha ay warqadda dheellitirka (of-balance sheet items), dhinaca kale.

Qod. 15aad

Xisaabinta Raasumaalka la doonayo

1. Marka la sameynayo xisaabta lagama maarmaanka ah si loo hubiyo in ay hay'addaasi maaliyadeed ay fulisay shuruudaha looga doonayo Qodobka 14aad, hay'adda maaliyadeed waa in ay ku talo gashaa codadka soo socda iyada oo raalligelineysa Bankiga Dhexe iyo baarayaasheeda:
   b) qiima dhaca hantida iyo deymanka quusta ah oo ay tahay in la xisaabiyo sannadkiiba mar;
   t) khasaarooyinka ka dhasha hawlaha is biirsaday oo ay ka mid yihiin qiima dhaca hantida iyo deymanka quusta ah ee aan weli la tirtirin;
   j) kharajyada hordhaca oo ay ka mid yihiin kharajyada la xiriira abaabulka ama ballaarinta ama iibsashada goob shaqo (business) ama sumca (Good will) taasoo ay ka mid yihiin mushqaayadaha (underwriting commission);
   x) codad kale oo uu Bankiga Dhexe xeer ku soo qeexi doono.

Qod. 16aad

Lacagaha caddaanka ah ee loo baahan yahay

1. Banki kasta ama hay'ad kasta ee maaliyadeed oo hawl banki ka fulineysa Soomaaliya ee qodobkan xeer ahaan uu ugu dhaqayo Bankiga Dhexe, waxaa laga doonayaa in ay haystaan waqti kasta hanti caddaan ah oo aan ka yareyn tirada lacageed oo uu Bankiga Dhexe ku qeexi doono Faafinta Rasmiga ah iyo qoraallada uu u soo gudbiyo hay'ad kasta ee maaliyadeed. Tirada lacageed ee hantidaas la soo sheegay waa in lagu muujiyaa boqolleyda (per centage) uu ka yahay isu geynta keydka caadiga ah iyo midka muddeysan iyo qaamaha kale ee hay'ad kasta oo maaliyadeed sida uu tilmaami doono Bankiga Dhexe, ayadoo ayan boqolleydaasi ka yaraan doonin (shan iyo toban), kana badnaan doonin (soddon) boqolkiiba iyo iyadoo uu Bankiga Dhexe xusi doono, muddada dheeraadka ah iyo dhinnaadka hantida caddaanka ah la isugu celcelin doono. Ujeeddada qodobkan darteed, hormariska la siiyay hay'ad maaliyadeed ama laga helay laan dibadeed (overseas branch), ama xafiis hay'addaas ka mid ah, waxaa laga saari karaa xisaabinta keydka caadiga ah iyo midka muddeysan iyo qaameynta kale ee hay'addaas, hadduu Bankiga Dhexe Xeer ku soo saaro.

2. Awaamiirta Qodobkan lagu soo saaray waxaa si isku mid ah loogu dabaqi karaa Soomaaliya wuxuuna hirgeliyaa taariikhda la sheegayo muddo aan ka horreyn 21 maalmood ka dib soo saariddiisa, iyadoo la tixgelinayo in bankiga dhexe qoraalladiisa uu ku kala duwi doono noocyada bankiyada iyo hay'adaha amaahda. Kala qaybinta anwaacda hantida caddaanka ah ee lagu xusay xubin hoosaadka (3) ee qodobkan ayaa loo sameyn doonaa hadba hay'adda maaliyadeed siday rabto, taasoo bankiga dhexe soo sheegayo ilaa boqolkiiba shan (5%) dhigaalka caadiga ah iyo midka muddeysan iyo qaamaha kale ee hay'adaha maaliyadeed ayaa loo hayn doonaa hanti ahaan sida midka afraad ee ku xusan xubin-hoosaadka (3) (x).

3. Ujeeddada qodobkan darteed, "hantida caddaanka ah" waxay ka koobnaan doontaa hanti si furan la isu weydaarsan karo oo ka madax bannaan lacag ka reebid (charges) ama xayiraad (lien) nooc kasta leh waxayna ka kooban yihiin sidatan:-

   b) Xaashi lacageed iyo cadaddii (Coins) kuwaasoo si sharci ah loogu dhaqmo Soomaaliya;

   t) Haraaga yaalla Bankiga Dhexe oo ka duwan midka keydka loo baahan yahay (Required Reservers);

   j) Saafiga haraaga yaala hay'ad maaliyadeed ee Soomaaliya iyo lacagaha loo yeelan karo (money at call) ee Soomaalida, iyadoo la tixgelinayo haddii ay haraayadaasi yihiin kuwa lagu leeyahay waa in laga jaraa hantida caddaanka ah;

   x) Warqadaha deymanka Dawladda iyo kuwa kale ee Dawladdu soo saarto ayagoo ku bislaanaya muddo boqol siddeetan iyo lix (186) maalmood ah;

   kh) Kambiyaalayaasha ee lagu sarifan karo (rediscount) Bankiga Dhexe iyo warqadaha makhaasiinnada (Where-house Warant) ama wax u dhigma oo sugaya lahaanshaha badeecooyin ee Bankiga Dhexe ku bixin karo hormaris, iyadoo la ilaalinayo xadka uu Bankiga Dhexe u gooyay, waafaqsanna qiimeyntiisa;

   d) Haraaga saafiga ah oo u yaala hay'ad maaliyadeed oo ay ka mid yihiin xafiisyo ama laamo hay'ad maaliyadeed oo ka tirsan gobol lacageed oo uu oggolaaday Bankiga Dhexe, iyadoo la tixgelinayo in Bankiga Dhexe ku soo qeexi doono xeer si loogu dhaqmo in haraaga uu is raacsiisan yahay ama qayb ka mid ah markii loo eego Xarunta hay'ad maaliyadeed

ama hay'ad maaliyadeed kasta ee dibadda laga abaabulay iyadoo mar kasta la tixgelinayo haddii uu noqdo haraagu mid lagu leeyahay in laga jaro hantida caddaanka ah;

r) Lacagaha looga yeelan karo (gobol lacageed ee uu Bankiga Dhexe ku oggolaaday qaybta (x), kambiyaalayaasha (Bills of Exchange) oo wata ugu yaraan laba saxiix oo fiican, kuna qoran in meel walba laga bixin karo ee gudaha gobol lacageed oo laga oggol yahay, iyo warqadaha deymanka dawladdu soo saarto ee gobol lacageed laga oggol yahay kuna bislaanaya muddo boqol, sideetan iyo lix (186) maalmood ah.

4. Hay'ad maaliyadeed waxaa loo aqoonsan doonaa inay jebisay qodobkan haddii:

b) Marka ay warbixinnada looga baahan yahay ay Bankiga Dhexe ugu keeni waydo muddo macquul ah, si Bankiga Dhexe ugu qanco in hay'addaasi maaliyadeed ay ku dhaqmayso shuruudaha qodobkan ama;

t) Marka ay oggolaato in ay haysato hanti caddaan ah oo ka yar tirada lacageed ee mar walba uu soo sheegi doono Bankiga Dhexe; ama

j) Muddada ay hay'addu ku jirto nusqaan lacag caddaan ah ama oggolaata in ay kordhiso horumariskeeda taagan, ha noqdeen amaah ama xisaab furan (Over drafts) ama maalgelin (Investment portfoglio).

5. Hay'ad kasta oo maaliyadeed oo oggolaata in ay haysato hanti caddaan ah oo ka yar tirada lacageed oo mar walba Bankiga Dhexe soo sheego ee qodobkan, waxaa Bankiga Dhexe amrayaa in ay bixiso (Charges) kuna bixiso heer sannadeed (Annual rate) oo aan ka badnayn toban dhibcood heerka ugu sarreeya ee uu Bankiga Dhexe u gooyey hawlihiisa inta ay hay'addaasi ku sii jirto nusqaantaas.

Qod. 17aad
(Hantida ugu yar ee looga baahan yahay Soomaaliya gudaheeda

Hay'ad maaliyadeed hantida Soomaaliya looga baahan yahay waa in aysan ka yaraan qiimo ahaan (in value) isku dhigan (such ratio) marka loo eego celceliska dhitada caadiga ah iyo midda

muddaysan iyo qaamaha kala duwan (other liabilities) ee uu cayimay Bankiga Dhexe lagana bixinayo Soomaaliya, iyadoo lagu caddeynayo Xeerarka uu Bankiga Dhexe soo saaro waqti ilaa waqti. Waa in saddex bilood loo go'aamiyo celceliska qaamaha caadiga iyo kuwa muddaysan.

Qod. 18aad
(Ciribtirka Qaybsashada Faa'iidada)

Hay'ad maaliyadeed kuma dhawaaqi karto, ma qaan-siin karto mana qaybin karto faa'iidada mana wareejin karto haddii ay is-dhin ku samaynayso raasumaalka ama inta ugu yar ee xisaabta keydka laga rabo ama haddii aan samayn ku-talo-gal raalli gelin karta Bankiga Dhexe sida uu farayo qodobka 15aad.

Qod. 19aad
(Xaddidaadda Amaahda iyo Hawlaha kale)

1. Haddii aannu Bankiga Dhexe oggolaan ama amar ku bixin, hay'ad maaliyadeed, si toos ah ama si dadban uma:-

   b)Siin karto deeq, horumaris iyo amaah uma samayn karto dammaanad haddii deeqda, horumariska amaahda iyo dammaanaddu ay ka badan tahay qiimo ahaan 15%, raasumaalka iyo haraaga xisaabta kaydka oo aan is-dhimin waqtiguu doono ha ahaato, hase yeeshee, Bankiga Dhexe ayaa Xeer ku qeexi doona:

   i) xadka ugu sarreeya ee aan la dhaafin karin amaahda qofka la siinayo iyo;

   ii) xadka ugu sarreeya amaahyada waaweyn, kuwaas oo ah kuwa ka badan 15% raasumaalka iyo haraaga xisaabta keydka oo aan is-dhimin. Xaddidaadda wax is-dhaafsiyada kor ku xusan kuma jiraan:

   iii) jeegagga iyo kambiyaalaha lagu sameeyo kalsami oo leh dhab ahaan hanti dabooli karta, ama kambiyaalaha nooca iyo bislaanshahooda oo uu Bankiga Dhexe Xeer ku oggolaaday ama xaashiyo ganacsi oo uu leeyahay qofka gaday ama ku sameynaya (discount) isagoo ka gadaya hay'ad maaliyadeed ama u wareejinaya ama uu isagu damiintay;

iv) dammaanad rahan leh oo si buuxda loo cayimay lehna qiimo rahankeeda uu arkay Sarkaal ka tirsan hay'ad maaliyadeed in kalsooni lagu aqbali karo, ayna ka badan tahay 15% wixii la damiintay;

v) amaahyo ay dammaanad qaadday Dawladda, Hay'adaheeda, Wakaaladaheeda iyo Dawladaheeda Hoose.

t) in ay bixiso horumaris dammaanad looga dhigay saamiyadeeda;

j) in ay bixiso ama fasaxdo horumarisyo taagan oo aan dammaanad lahayn, haddii kuwaas aanay si wadajir ah isugu raacin Xubnaha Guddiga Maamulka (Board members), horumarisyadaas oo la siinayo gebi ahaantood ama qaar ka mid ah;

x) in ay siiso ama fasaxdo in ay u taagnaadaan horumarisyo aan dammaanad ahayn:

i) qof ay Hay'addu dan ka leedahay ama uu dan ka leeyahay mid ka mid ah Agaasimayaashooda, in uu noqdo Agaasime, Maamule, ama Saamile;

ii) cid allaale ciddii si toos ah ama si dadbanba dab ku leh hantida codka leh (voting stock) ee hay'adda lacagtaas, taas oo siinaysa in ka badan 20% guud ahaan awoodda codka.

kh) Deeq ama u oggolaansho in ay ku taagnaato Saraakiisha iyo Shaqaalaha horumaris aan dammaanad lahayn, taasoo guud ahaan noqon karta in ay ka badnaato xuquuqdooda sannadka la siiyey Sarkaalkaas ama Shaqaalahaas.

d) In uu galo ganacsi, marka laga reebo wixii baahi joogto aan ahayn shaqadiisa ku xiran amase deyn ku soo ceshanayo.

r) Hay'ad maaliyadeed looma oggola lahaansho ama kiro dhul haddii aysan ahayn kuwo lagu shaqaynayo ama ay ku nool yihiin Shaqaaluhu ama kuwo lagu ballaarinayo shaqadeeda. Ujeeddadan darteed:

i) Sharcigan intuusan dhaqan-gelin ka hor haddii ay jiraan dhul ay leedahay ama kiro ah oo ka baxsan ujeeddooyinka halkan lagu xusay waxaa hay'addaas maaliyadeed laga rabaa in ay muddo toban sano ah ku dhaqan geliso qodobkan;

ii) Hay'ad maaliyadeed waxay dammaanad ku haysan kartaa hanti dhab ah ama kuwo kale, haddii la bixin waayo deynta hahtidaas waa in sida ugu dhaqso badan ay u gaddaa.

